United Nations Educational, Scientific and Cultural Organization

# SAYNIS



BUUGGA 4

## Hordhac

Buuggan oo ah sayniska fasalka 4aad, waxaa soo diyaariyey Xarunta Horumarinta Manaahijta ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta, waxaa uu ka mid yahay buugaagta manhajka cusub ee 1985ka bilaabmay.


Buuggan ujeeddada ugu weyn ee laga leeyahay waxa ay tahay in ardayda lagu abuuro xirfado ay degaaan- kooda ku fiirsadaan kuna baaraan, iyo in la siiyo aqoon sayniseed oo saldhig u noqon karta barashada sayniseed ee mustaqbalka.

Xasan Daahir Obsiye
Agaasimaha X. Horumarinta Manaahijta


Buuggaan waxaa soo ururiyay, iskuna soo dubariday daabacaadiisa labaad Kooxda Farsamada ee Xafiiska UNESCO-Baydhabo u qaabilsan talabixinta waxbarashada.

Agoosto 1995

# SAYNIS
# 4



*Aad u fiirso xayawaanada ka muuqda sawirkan. Sheeg mid walba magaciisa.*




*Maxaa aad ku aragtaa Sawirradan hoose. Ma sheegi kartaa waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin.*

*Weligaa yaxaas ma aragtay? Halkee ayaa uu ku nool yahay?*

*Ma jiraan Xayawaano kale oo meeshaa ku nooli? Saddexda meelood ee sawirka hoose ka muuqda midkee ayaa ay jeertu ku nooshahay? Xayawaannada Sawirka Sare ka muuqda kuwee ayaa degaanka Sawirka labaad ku noolaan kara? Xayawaannada Sawirka Sare ka muuqda mid walba ku beeg saddexda degaan ee hoose midka uu ku noolaan karo.*

*Yaxaasku ma ku nool yahay degaanka ka muuqda sawirka saddexaad?*


*Shabeelku saddexda degaan ee sawirka hoose ka muuqda midkee ayaa uu ku nool yahay?*

*Layli:*

1. *Sheeg magacyada saddex degaan oo xayawaanku ku nool yahay?*
   *b)____________ . t)____________ j)____________ .*
2. *Rahu waxa uu ku nool yahay.(Lamadegaanka, kaymaha, biyaha).*
3. *Xayawaannada kaymaha ku nool waxa ka mid ah: (Kalluunka, daayeerka, diinka).*



## 1.2 Degaanka biyaha




*Sawirradan aad ugu fiirso.Waxa ay ku tusayaan degaan biyood. Sheeg waxyaabaha kaaga muuqda degaankan. Xayawaannada degaankan kaaga muuqda kuwee ayaa biyaha oo keliya ku nool? Xayawaannadan ma ku aragtaa kuwa biyaha iyo berriga labadaba ku noolaan kara? Halkee ayaa ay xayawaannada ku nool biyaha ka helaan cuntadooda?*

*Xayawaannada biyaha ku nool qaarkood waxa ay neefta ka qaataan biyaha dhexdooda.Qaarna muddo dheer ayaa ay biyaha ku dhex jiri karaan iyaga oo aan neefsan. Adigu sida jeerta oo kale muddo dheer biyaha ma ku dhex jiri kartaa adiga oo aan neefsan? Sidee ayaa uu rahu biyaha u dhex maraa? Weligaa meel biyo fariisin ah ma aragtay?*

*Dhirta meelahaa ka baxda wax ma ka taqaan?*

*Sheeg magacyada kuwa aad taqaan?*

*Maxaa ay dhirtaasi kaga duwan tahay kuwa bannaanka ka baxa?*

*Layli:*


1. *Sheeg magacyada afar xayawaan oo ku nool biyaha.*

   *b)* ___________ *t)* ___________ *j)* ___________ *x)* ___________

2. *Magacow laba geed oo ka mid ah dhirta ka baxda meelaha biyo fariisadka ah. b)* *t)*
3. *Sharax siyaabaha ay xayawaannada biyaha ku nooli ku helaan cuntadooda?*
4. *Yaxaaska iyo dadka midkee ayaa biyaha muddo dheer ku dhex jiri kara? Sheeg sababta.*



## 1.3 Nolosha kalluunka




*U fiirso sawirkan. Maxaa aad ku aragtaa? Weligaa kalluun ma aragtay? Tilmaan Sida uu u eg yahay. Kalluunku lugo ma leeyahay? Halkee ayaa uu ku nool yahay kalluunku? Kalluunku waxa uu leeyahay astaamaha noolaha. Kalluunka wuxuu u baahan yahay hawo uu neefsado.*


Kalluunku hawo buu u baahanyahay

Kalluunku hawo buu neefsadaa

*Kalluunku uma helo hawada sida aynu u qaadanno. Kalluunku ma laha sambabo ee waxa uu leeyahy waafyo. Eeg sawirka sadd-exaad. Kalluunku biyaha ayaa uu kala baxaa* **hawada uu neefsado isaga oo adeegsanaya** *waafyada. Sheeg astaamaha kale ee kalluunka. Halkee ayaa uu cuntadiisa ka helaa?*




K. biyaha ayuu kala baxaa hawada uu neefsado isaga oo adeegsanaya waafyada





*Aad u fiirso sawirka 3aad. Maxaa aad ku aragtaa? Sheeg xubnaha kalluunka ka muuqda sawirka 3aad. Sharax xubin walba waxa ay kalluunka u tarto. Maxaa aad ku aragtaa sawirka afraad. Sidee ayaa uu kalluunka u tarmaa?*

*Layli:*

1. *Sheeg faa'iidada ay waafyuhu u leeyihiin kalluunka.*
2. *Magacow xubnaha kalluunka ka caawiya dabbaasha.*
3. *Sawir kalluun, ka dibna ku muuji xubnihiisa kala duwan.*



## 1.4 Degaanka kaymaha




*Aad ugu fiirso sawirradan. Maxaa ay ku tusayaan?Sheeg waxyaabaha kala duwan ee kaaga muuqda sawirradan? Ma sheegi kartaa degaanka sawirradani ku tusayaan? Magacow xayawaannada kala duwan ee degaankan ka muuqda. Weligaa ma tagtay meel kayn ah? Tiri xayawaannada ku nool Kaymaha.*


Daayeerrada sawirka koowaad ka muuqdaa maxaa ay samaynayaan? Ma taqaan xayawaanno kale oo dhirta fuuli kara? Ma ku badan yihiin xayawaannadaasi kaymaha? Maxaa ay kula tahay xayawaannadaasi in ay dhirta u fuulaan? Ma jiraan xayawaanno kale oo aan dhirta fuulin oo kaymaha ku nool? Kuwee ayaa ka mid ah xaywaannadaasi? Dugaagga iyo ugaarta midkee ayaa ku badan kayamaha? Maxaa ay kula tahay sababtu?

Layli:

1. Sharrax erayga kayn.
2. Sheeg lix xayawaan oo kayamaha ku nool.
3. Magacow afar xayawaan oo aan kayamha ku noolayn.
4. Kaymuhu wax faa'iido ah ma innoo leeyihiin?







Aad ugu fiirso sawirradan. Maxaa ay muujinayaan. Sheeg waxyaabaha kala duwan ee kaaga muuqda sawirradan. Ma sheegi kartaa degaanka sawirradani ku tusayaan? Magacow dhirta iyo xayawaannada degaanka ka muuqda. Ma sheegi kartaa xayawaanno kale oo laga helo lamadegaanka?

Ma sheegi kartaa carrada lamadegaanku nooca ay tahay?

Wax ma laga beeri kartaa carradaas? Magacow xayawaanno kale oo aan ahayn kuwa ka muuqda sawirka koowaad oo lamadegaannada ku nool. Maxaa aad u malaynaysaa cimilada lamadegaannada? Ma kulayl mise qabow? Roobku ma ku yar yahay lamadegaannada mise waa ku badan yahay?


Ma u malaynaysaa in lamadegaannada caws ka baxo?

Layli:

1. Sharax erayga lamadegaan.
2. Sheeg afar xayawaan oo laga helo lamadegaannada.
3. Sheeg laba geed oo ka baxa lamadegaannada, oo aan ahayn kuwa ka muuqda sawirka 1aad.
4. Lamadegaannada iyo kaymaha midkee ku fiican nolosha.








1

Maxaa sawirkan kaaga muuqda? Weligaa ma aragtay xayawaanka sawirkan ka muuqda?



2


Magacow xubnaha waaweyn ee geelu leeyahay. Immisa addin ayaa uu geelu leeyahay? Cagta geela maxaa lagu magacaabaa? Candhada geelu xaggey kaga taallaa neefka?

Qoorta geelu ma dheertahay mise waa ay gaaban tahay? Qoorta dheeri maxaa ay ku tartaa geela? Cagta ballaarani maxaa ay u tartaa geela? Tiri faa'iidooyinka geelu innoo leeyahay? Geelu dhogor ma leeyahay? Geelu harraadka ma u adkaystaa?

Layli:

1. Magacow xoolaha ku nool degaankaaga.
2. Degaankiinna geel ma ku nool yahay?
3. Sheeg siyaabaha geela looga faa'iidaysto degaankiinna.
4. Midabka geela walxaha soo socda kee buu u eg yahay?


   b) Doogga  t) Ciidda  j) Cirka.
5. Magacow magacyada xubnaha sawirkan.











Boggan waxa aad ku aragtaa laba saf oo sawirro ah,

Saf waxa uu ku tusayaa xayawaanno kala duwan.

Safka kalena waxa aad ku aragtaa degaanno kala duwan,








Magacow xayawaannada iyo degaannada mid walba. Xayawaannadan mid walba ku beeg degaanka ku habboon ee uu ku nool yahay.


Degaannadaa mid walba tiri xayawaanno kale oo ku nool. Degaannadan xayawaannadan ku nool mid walba tusaale ka bix. Tilmaan astaamaha u suurtageliyay in uu xayawaankaasi ku noolaado degaankaas.




Magacow saddex geed oo ka baxa lamadegaanka.




Maxaa ay dhirtaas kaga duwan tahay kuwa ka baxa meelaha biyuhu ku badan yihiin?



Layli:

1. Magacaw saddex degaan oo laga helo noolaha.

   b) __________ t) __________ j) __________

2. Tusaale ka bixi degaannadaa mid walba hal xayawaaan oo ku nool. b) __________ t) __________ j) __________

3. Weerahan mid walba ku buuxi erayga ku habboon.

   b) Kalluunku waxa uu cunaa dhirta iyo __________ laga helo biyaha.

   t) Geelu waxa uu noolaan karaa muddo __________ isaga oo aan biyo iyo cunto midna helin.

4. Ku buuxi weer walba labada eray ee ku hor qoran midda ku habboon.


   b) Kalluunku marka uu neefsanaya waxa uu adeegsadaa __________ sanbabadiisa, waafyihiisa).

   t) Xayawaannada ku nool lamadeganka waxaa ka mid ah __________ (maroodiga, geela).

   j) Tiinku waxa uu ka mid yahay dhirta laga helo __________ (kaymaha, lamadegaannada).








Aad ugu fiirso sawirradan. Immisa xayawaan oo kala duwan ayaa aad ku aragtaa? Sheeg magacyadooda. Weligaa ma aragtay xayawaannadaa oo nool? Daayeerku ma koox koox ayaa uu u nool yahay, mise keli keli? Sawirradan ma ku aragtaa xayawaan kale oo sida daayeerka u nool? Magacow, sawirradan ma ku aragtaa xayawaanno keli keli u nool? Sheeg magacyadooda.


*Layli:*


*Buuxi tusahan adiga oo adeegsanaya xayawaannada degaankaag laga helo.*

| *Xayawaan* | *Bulsho u nool* | *Bulsho aan u noolayn* |
|---|---|---|
| *Shinni* | | |
| *Llbaax* | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |









*Eeg sawirradan. Maxaa aad ku aragtaa? Sharax mid waliba waxa uu muujinaya? Weligaa shinni ma aragtay? Keli-keli iyo bulsho midkee ayaa ay u nooshahay?Shinnidu waxa ay u nooshahay nolol habaysan. Waxa ay kala leedahay qaybo sida Madax, Shaqaale iyo kuwo lab. Maxaa loo yaqaan xabbadda shinnida u Madaxda ah? Maxaa ay kula tahay in ay shaqaaluhu qabtaan? Shinnidu wax faa'iido ah ma innoo leedahay? Maxaa ay Shinnidu malabka ka samaysaa? Shinnidu wax dhibaato ah ma leedahay? Sharax sida Shinnida la iskaga ilaaliyo marka malabka lala baxayo.*


*Weerahan soo socda mid walba waxa ku hor qoran laba eray.*

*Weer walba ku buuxi erayga ku habboon.*

1. *Shinnidu waxa ay u nooshahay ___________ (keli-keli, bulsho).*
2. *Shinnidu waxa ay leedahay __________ (Boqor, Boqorad).*
3. *Qaybaha shinnida waxaa ka mid ah __________ (Boqor, Shaqaale).*
4. *Shinnida waxa laga helaa ___________ (Malab, subag).*
5. *Shinnida wax dhasha waxa loo yaqaan _________ (Boqorad, Shaqaale).*








*Sawirka koowaad waxa aad ku aragtaa xayawaanno kala duwan. Sheeg mid walba magaciisa. Maxaa uu mid walba samaynayaa? Xayawaannada sawirka kowaad immisa ayaa cuna xayawaannada kale?*

*Ma ku aragtaa sawirkaa xayawaan dhirta cuna? Maxaa ay kula tahay in shimbirta hasha ku taagani ay samaynayso? Ma taqaan xayawaanno ku dul nool xayawaannada kale? Wax ka sheeg magacyadooda.*

*Sheeg magacyada xayawaannada ka muuqda sawirka labaad. Halkee ayaa uu mid walba ka helaa cuntadiisa? Ma taqaan xayawaanno kale oo siyaabahaa cuntadooda ku hela? Xayawaannadaasi wax dhibaato ah ma u leeyihiin kuwa ay ku dul nool yihiin? Sharax kooban ka bixi dhibaatooyinkaasi. Maxaa loo yaqaan xayawaannada ku dul nool kuwa kale.*


*Layli:*

*Buuxi tusahan adiga oo adeegsanaya xayawaannada laga helo deegaankiinna.*

| *Xayawaan* | *Hilib-cun* | *Dhir-cun* | *Dulin* |
|---|---|---|---|
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |




## 2.4 Qaybaha xayawaanka



1

*Maxaa aad ku aragtaa sawirkan?*

*Waa maxay xiriirka ka dhexeeya waxyaabaha ka muuqda sawirkani?*



2

*Sheeg waxyaabaha aad ku aragtid sawirkan. Maxaa ay ku kala duwan yihiin waxyaabaha ka muuqda sawirkan iyo midka sare?*


*Xayawaannada sawirka koowaad ka muuqda lafo ma leeyihiin? Maxaa loo yaqaannaa lafaha xayawaanka marka ay is-haystaan ee aanay wax hilib ah lahayn? Sheeg xayawaanno kale oo lafo leh. Sheeg magacyada xayawaannada ka muuqda sawirka labaad. Xayawaannada sawirka labaad ka muuqda lafo ma leeyihiin? Sheeg xayawaanno kale oo aan lafo lahayn. Xayawaannada lafaha leh iyo xayawaannada aan lahayn midkee waaweyn?*

*Layli:*

1. *Waa maxay qalfoof?*
2. *Sheeg lix xayawaan oo lafo leh?*
3. *Sheeg afar xayawaan oo aan lafo lahayn?*
4. *Jiirku lafo ma leeyahay?*
5. *Xayawaannada lafaha leh ee deegaankiinna laga helo kuwee ugu badan?.*








*Sawirkan koowaad waxa aad ku aragtaa xaywaanno kala duwan. Sheeg mid walba magaciisa. Weligaa ma aragtay iyaga oo nool. Wax dhibaato ah dadka ma u leeyihiin xayawaannadaasi? Haddii ay wax dhibaato ah u leeyihiin dadka wax ka tilmaan dhibaatooyinkaasi. Ma sheegi kartaa xayawaannadan mid walba meelaha laga kala helo? Maxaa aad ku aragtaa sawirka labaad? Sidee ayaa xayawaannadan loola dagaalamaa?*

Ma taqaan xayawaanno kale oo dadka waxyeello u geysta?


Sheeg magacyadooda. Sharax mid walba dhibaatada uu dadka u geysto?

Layli:

1. Magacow afar xayawaan oo dadka cudur u keena.
2. Magacow laba cudur oo ay xayawaannadu dadka u keenaan.
3. Sheeg hal meel oo ay baranbaradu aad ugu badan tahay.
4. Sheeg laba siyaabood oo loola dagaallamo duqsiga.
5. Kaneecada iyo shinnida midkee ayaa dadka u keena cudur?








Sawirka koowaad waxa uu inoo muujinayaa meertada nolosha ee kaneecada. Kaneecadu waxa ay martaa iseddello badan marka ay korayso. Si aad u aragtid isbeddelladaasi samee tijaabada sawirka labaad. Soo qaado koob dheer oo quraarad ka samysan. Ku shub biyo iyo xoogaa caws qoyan ah. Dhig koobka meelaha ay kaneecadu ku badan tahay sida ashuunka agtiisa ama musqusha. U daa koobka meeshaas laba ilaa saddex habeen adiga oo subax walba fiirinaya. Marka aad ku aragtid lulumo biyaha dhexdooda soo qaado afar qori oo dhuuban, xarig yar iyo gobol ah gambada dumarka ee loo yaqaan il-yarta. Gambada iyo qoryaha ka samee shabaq adiga oo ku dahaaraya koobka sida sawirka labaad ka muuqata.


Subax walba fiiri koobka ilaa aad shabaqa dhexdiisa ku aragtid kaneeco. Halkee ayaa ay kula tahay in ay kaneecadaasi ka timid?

Layli:

1. Maxaa loo yaqaan cudurka ay kaneecadu keento?
2. Sheeg laba siyaabood oo la iskaga ilaaliyo kaneecada?
3. Halkee ayaa ay kaneecadu ku tarantaa?
4. Magacow saddex heer oo kaneecadu marto marka ay koraysa
5. Sawir kaneeco adiga oo ku muujinaya qaybaha jirkeeda.








Sawirka koowaad waxa aad ku aragtaa heerarka kala duwan ee nolosha duqsigu soo marto Duqsigu waxa uu dhalaa ukun. Duqsigu waxa uu ku dhala meelaha wasakhda ah. Weligaa meelaha qashin-qubka ah ama xoolaha bakhtiyey ma ku aragtay dirxiyo ku jira. Dirxiyadaasi waa heer ka mid ah heerarka nolosha duqisga. Dirxigaasi waxa ay isku rogaan duqsiga waaweyn. Eeg sawirka labaad. Maxaa uu muujinyaa? Duqsigu immisa baal ayaa uu leeyahay? Duqsigu wax dhibaato ah ma inoo leeyahay?

Sheeg laba cudur oo uu duqsigu fidiyo. Sidee ayaa looga hortegi karaa dhibaatada uu duqsigu keeno?

*Layli*


*Weerahan soo socda mid walba waxa ku hor qoran laba eray.*

*Ku buuxi weer walba erayga ku habboon.*

1. *Duqsigu waxa uu dhalaa______________ (ukun, ilmo u eg)*
2. *Duqsigu waxa uu ku tarmaa ____________(meelaha waskhda ah, meelaha nadiifka ah).*
3. *Heerka labaad ee korriimada duqsiga waxa loo yaqaan _____ (ukun, caydi).*
4. *Heerka saddexaad ee korriimada duqsiga, waxa loo yaqaan (buuley, caydi).*
5. *Duqsigu waxa uu leeyahay__________lugood (afar, lix).*








*Aad ugu fiirso xayawaannada sawirka koowaad ka muuqda. Sheeg mid walba magaciisa. Wax dhibaato ah ma innoo leeyihin xayawaannadani? Wax ka sheeg. Weligaa beer baxaysa ma aragtay? Xayawaannadani waxyeello ma u leeyihiin beeraha? Sheeg mid walba dhibaatada uu u leeyahay beeraha. Ma jiraan xayawaanno kale oo beeraha waxyeela? Sheeg magacyadooda.*


*Sharax mid walba dhibaatada uu u leeyahay beeraha. Xayawaannada qaarkood waxa ay waxyeelaan miraha kaydsan. Wax ka sheeg magacyadooda. Sharax siyaabaha loola dagaallamo xayawaannadaasi. Maxaa uu sawirka labaad muujinayaa?*

*Layli:*


1. *Sheeg magacyada afar xayawaan oo beeraha dhibaato u leh.*
2. *Magacow hal xayawaan oo abuurka dhulka kala soo baxa.*
3. *Magacow hal xayawaan oo miraha kaydsan cuna.*
4. *Sheeg laba siyaabood oo xayawaannada dalagga cuna loola dagaallamo.*
5. *Sheeg afar xayawaan oo miraha cuna marka ay sabuulka yihiin.*




## 2.9 Nolosha ayaxa




*U fiirso xayawaanka sawirka koowaad ka muuqda. Magacow qaybihiisa waaweyn ee muuqda.*




*Ayaxu waa uu tarmaa sida xayawaannada kale. Maxaa aad u malaynaysaa in mid kasta oo sawirka labaad ka mid ahi uu muujinayo. Sawirrada sawirka labaad ku yaalla marka la isku daro maxaa ay innoo sheegayaan.*

U fiirso sawirka saddexaad, maxaa uu inna tusayaa. Ayaxu xaggee ayaa uu cuntadiisa ka helaa? Wax dhibaato ah ma innoo leeyahay ayaxu? Sheeg dhibaatooyinka uu innoo geysto. Sidee ayaa looga hortegi karaa waxyeellada ayaxa? Ayaxu ma keli-keli ayaa uu u nool yahay, mise koox-koox.

Layli:

1. Sheeg qaybaha ugu waaweyn ee ayaxa.
2. Sharax meertada nolosha ee ayaxa.
3. Ayaxu wax dhibaato ah ma u geystaa beeraha?
4. Ayaxu ma waxa uu dhalaa ukun, mise wax u eg?
5. Ukunta ayaxu marka ay dillaacdo maxaa loo yaqaannaa?



## 2.10 Xayawaanku waxtar ma innoo leeyahay




Lo'du waxa ay ka mid tahay xoolaha aan dhaqanno. Lo'du waxa ay innoo leedahay waxtar kala duwan. Sawirrada safka midig kuwee ayaa muujinaya waxtarka lo'du innoo leedahay?




Tiri faa'iidooyinka kale ee ay lo'du leedahay.

Ma jiraan xaywaanno kale oo iyaguna waxtarkaa oo kale innoo lihi? Sheeg magacyadooda iyo mid walba waxtarka uu innoo leeyahay.




Ma aragtay weligaa xayawaanka sawirka labaad ka muuqda? Sheeg magaciisa. Xayawaankani wax faa'iido ah ma innoo leeyahay? Wax ka sheeg waxtarka xayawaankani innoo leeyahay.






Sawirrada safka midig midkee ayaa muujinaya faa'iidada xayawaankani innoo leeyahay? Ma taqaan xayawaanno kale oo la mid ah xayawaankan? Tiri magacyadooda.




Eeg sawirkan saddexaad. Waxa aad ku aragtaa dameer. Wax faa'iido ah ma innoo leeyihiin dameeruhu? Wax ka sheeg faa'iidooyinkaasi. Ma jiraan xayawaanno kale oo waxtarkaasi innoo lihi? Tiri magacyadooda.

Sawirrada safka midig midkee ayaa muujinaya waxtarka dameeraha.






*Digaaggu waxa uu ka mid yahay xayawaanka dadku dhaqdo.*

*Digaaggu waxa uu u baahan yahay in la xannaaneeyo sida xoolaha.*

*Tiri waxyaabaha loo baahan yahay si digaagga loo xannaaneeyo.*

*Digaagga ma u baahan yahay hoy sida dadka?*


*Sharax waxtarka hoygu u leeyahay digaagga.*

*Digaaggu sida noolayaasha kale waxa uu u baahan yahay hawo uu ku neefsado iyo cunto. Eeg labada sawir ee sare.*

*Midkee ayaa muujinaya digaag si fiican loo xannaaneeyo?*

*labada guri mikdee ayaa ku habboon nolosha digaagga? Sheeg sababta.*







*Digaagga waxa ku dhaca cudurro sida dadka iyo xoolaha.*

*Wax ka sheeg cudurradaa. Sharax waxyaabaha keena cudurradaasi iyo sida looga ilaalin karo. Eeg sawirka saddexaad. Maxaa aad ku aragtaa? Sharax waxa uu muujinayo sawirkaasi.*

*Layli:*

1. *Sheeg afar waxyaabood oo uu digaaggu u baahan yahay si loo dhaqo.*
2. *Magacow hal xayawaan oo digaagga cudur u keena.*
3. *Magacow afar cunto oo uu digaaggu cuno.*
4. *Sheeg laba waxyaabood oo digaagga laga helo.*
5. *Magacow laba xayawaan oo digaagga cadow u ah.*


1


2


*Aad ugu fiirso labadan sawir. Sawirka koowaad waxa aad ku aragtaa dibi, sac iyo weyl yar. Sawirka labaadna waxa aad ku aragtaa diiq, digaagad iyo digaag yar. Maxaa ay kula tahay in ay labada sawir inna tusayaan. Maxaa ay ku kala duwan yihiin ilmaha sacu dhalo iyo kuwa digaagaddu ay dhasho? Ma taqaan xayawaanno kale oo sida digaagga ukun dhala? Xayawaannadaasi dhammaantood ma shimbiraa? Ma taqaan xayawaanno aan ukun dhalin? Maxaa ay dhalaan xayawaannadaasi? Tiri xayawaannada aan ukunta dhalin ee degmadiinna laga helo.*



*Layli:*

*Weerahan soo socda middii sax ah horteed ku qor calaamaddan ( ) middii khalad ahna calaamaddan (X).*

1. *Xayawaannada qaarkood waxa ay dhalaan ukun, qaarkoodna ilmo u eg (   ).*
2. *Libaaxa iyo goroyada waxa ay ka mid yihiin xayawaannada ukunta dhala (   ).*
3. *Diinka iyo farduhu waxa ay ka mid yihiin xayawaannada ilmaha u eg dhala (   ).*
4. *Lo'da iyo geelu waxa ay ka mid yihiin xayawaannada ukunta iyo ilmaha u eg labadaba dhala (   ).*
5. *Dameeruhu waxa ay dhalaan ilmo u eg oo keliya (   ).*
6. *Xayawaannada ukunta dhalaa dhammaantood waa ay duulaan ( ).*



*Sawirkan waxa ka muuqda xayawaanno kala duwan.Sheeg mid walba magaciisa. Dhammaan xayawaannadani waxa ay dhalaan ukun.*

*Tiri xayawaannada kale ee ukunta dhala ee aad taqaan.*


*Sheeg mid walba meesha uu ku dhalo. Yaxaasku biyaha iyo berriga midkee ayaa uu ku dhalaa? Ma jiraan xayawaanno biyaha dhexdooda ukunta ku dhalaa? Sheeg magacyadooda.*



*Digaagaddu ma xannaanaysaa ilmaheeda? Sharax siyaabaha ay u xannaanayso. Ma jiraan xayawaanno kale oo ukun dhala oo ilmahaooda xannaaneeya? Sheeg magacyadooda iyo siyaabaha ay u xannaaneeyaan.*

*Layli:*

1. *Magacow toban xayawaan oo ukun dhala.*
2. *Magacow laba xayawaan oo ukun dhala oo biyaha ku nool.*
3. *Magacow laba xayawaan oo ukuntooda dhulka ku aasa.*
4. *Sheeg laba siyaabood oo ay digaagaddu ilmaheeda u xannaanayso.*
5. *Sheeg kalluunka iyo qubadu mid walba meesha ay ukuntooda ku dhalaan.*




*Aad ugu fiirso sawirka koowaad. Waxa aad ku aragtaa xayawaanno kala duwan. Sheeg mid walba magaciisa. Dhammaan xayawaanada-asi waxa ay dhallaan ilmo u eg. Ma jiraan xayawaanno kale oo ilmo u eg dhalaa? Tiri magacyadooda. Xayawaannadaasi ilmaha ay dhalaan waa ay kala duwan yihiin. Qaarkooda marka ay dhashaanba waa ay socon karaan qaarna ma socon karaan. Labada nooc mid walba tuusaale ka bixi.*




*Eeg sawirka labaad. Waxa aad ku aragtaa daayeer ilmo xambaarsan. Ma taqaan xayawaanno kale oo ilmahooda qaada. Xayawaannadu marka ay dhashaan waxa ay u baahan yihiin xannaana.*

*Tiri xayawaanno ilmahooda xannaaneeya. Sharax mid walba sida uu ilmihiisa u xannaaneeyo.*

*Layli:*

1. *Magacow toban xayawaan oo ilmo u eg dhala.*
2. *Dhammaan xayawaannada wax u eg dhalaa ma nuujiyaan ilmahooda.*
3. *Magacow laba xayawaan oo ilmaha ay dhalaan marka ay dhashaanba socdaan.*
4. *Magacow laba xayawaan oo ilmaha ay dhalaan ayna socon karin marka ay dhashaanba.*
5. *Sheeg afar siyaabood oo ay xayawaannada wax u eg dhalaa ilmahooda u xannaaneeyaan.*

## 2.15 Naqtiin "Kala duwanaanta Xayawaannada"



*Sawirkan waxa ka muuqda xayawaanno kala duwan. Sheeg mid walba magaciisa. Immisa ayaa xayawaannadan bulsho u nool? Ma ku jiraan xayawaannadan kuwo keli-keli u nool? Sheeg magacyadooda. U kala saar xayawaannadan kuwo laf-dhabar leh iyo kuwo aan lahayn.*



*Immisa ayaa xayawaannadan dadka waxtar u leh? Sheeg magacyadooda iyo waxtarka ay dadka u leeyihiin. Xayawaannadan ma jiraan kuwa beeraha dhibaato u leh? Sheeg magacyadooda.*


*Layli:*

*Buuxi khaanadaha tusahan adiga oo adeegsanaya xayawaannada laga helo deegaankiinna.*

| *Xayawaan* | *Laf-dhabar leh* | *Laf-dhabar aan lahayn* | *Bulsho u nool* | *Cudur keena* |
|---|---|---|---|---|
| *Shiini* | *X* | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |

## 3 Cuntada iyo dadka

### 3.1 Ahmiyadda cuntada




*Dadku si ay u noolaadaan waxa ay u baahan yihiin cunto.*


*Cuntadu dadka waxa ay u leedahay waxtar kala duwan.*

*Tiri waxtarka ay cuntadu u leedahay dadka. Haddii aannu qofku wax cunin hawl ma qaban karaa? Sawirrada sare midkee ayaa muujinaya in aynnu cuntada tamar ka helno? Sawirrada sare midkee ayaa ay kula tahay in uu muujinayo in aynnu cuntada ka helno korriimo?*

*Wiilka sawirka labaad ma caafimaad qabaa mise waxa uu u eg yahay bukaan? Haddii aannu qofku cunto fiican helin maxaa ku dhaca?*



### 3.2 Qaybaha cuntada





*Maalin walba waxa aynnu cunnaa cuntooyin badan. Cuntooyinkaasi waa ay kala duwan yihiin. Cuntooyinkaasi waxa loo kala qaybiyaa shan qaybood. Qaybahaasi waa kuwa ka muuqda sawirka sare.*

*Qaybahaasi waxa lagu magacaabaa kaarbohaydrayt, borotiinno, dufan, fiitamiinno iyo macaadin.*

*Layli.*

1. *Magacow lix cunto oo degmadiinna laga cuno.*
2. *Immisa qaybood ayaa loo qaybiyaa cuntada?*
3. *Magacow saddex ka mid ah qaybaha cuntada.*
4. *Subaggu qaybaha cuntada midkee ayaa laga helaa?*



*Cuntadu waxa ay innoo leedahay waxtar kala duwan. Waxtarka cuntada waxa ka mid ah in jirkeennu ku koro. Cuntooyinka jirkeennu ku koro waxa ka mid ah kalluunka, hillibka xoolaha, ukunta, caanaha iyo digirta. Cuntooyinkaas waxa ku jira walax loo yaqaan borotiinno. Borotiinku waxa uu jirkeenna siiyaa koritaan. Cuntooyinka borotiinku ku jiro qaar waxa laga helaa xayawaanka, qaarna dhirta.*


*Dhakhaatiirtu waxa ay hooyada uurka leh kula taliyaan inay cunto cuntooyin uu borotiinku ku badan yahay. Waa maxay sababtu?*



*Layli:*

*Weerahan ku buuxi erayo ku habboon.*

1. *Cuntadu waxa ay innoo leedahay_________kala duwan.*
2. *Waxtarka cuntadu innoo leedahay waxa ka mid ah in_________ ku koro.*
3. *Cuntooyinka jirkeennu ku koro waxa ka mid ah_________ caanaha iyo_________.*
4. *Cuntooyinka jirkeennu ku koro waxa ku jira walax loo yaqaan _________*
5. *Cuntooyinka jirkeennu ku koro qaar waxa laga helaa_________ qaar dhirta.*
6. *Haddii aannu qofku cunin cunto borotiin leh jirkiisu si fiican uma _________*




*Maalin walba dadkú waxa uu qabtaa hawlo kala duwan. Si uu hawlahaasi u qabto dadku waxa uu u baahan yahay tamar. Tamarta dadku waxa uu ka helaa cuntada uu cuno. Cuntooyinka tamarta laga helo waxa ka mid ah galleyda, bariiska burka, bataatiga, sonkorta, malabka iyo timirta.*

*Cuntooyinkaasi waxaa ku jira walax loo yaqaan kaarbohaydraytyo. Cunto la'aan dadku hawl ma qaban karaa?*




*Layli*

*Weerahan mid walba horteeda waxa ku qoran laba eray.*

*Weer walba erayga ku habboon ku buuxi meesha bannaan.*

1. *Si uu qofku hawl u qabto waxa uu u baahan yahay_______ (borotiin, tamar).*
2. *Cuntooyinka tamarta laga helo waxa ka mid ah_______ (ukunta, bariiska).*
3. *cuntooyinka tamarta laga helo waxa ku jira walax loo yaqaan _______ (borotiin, kaarbohaydreyt).*
4. *Cuntooyinka kaarbohaydreytku ku badan yahay waxa ay jirkeenna siiyaan_______(koritaan, tamar).*
5. *Marka uu qofku cunto cunin waxa uu dareema_______ (tamar darro, firfircoonaan).*



*Marka aan rootiga ama canjeerada cunayno waxa aan ku iidaamanaa subag ama saliid. Subagga iyo saliidda waxa loo yaqaan dufan. Dufanka waxa aan ka helnaa ilo kala duwan sida caanaha, baruurta, lowska iyo sisinta. Dufanka waxa aan ka helnaa dhirta iyo xayawaanka labadaba. Dufanku sida kaarbohaydraytka ayaa uu jirkeenna siiyaa tamar.*


*Tamartu waxa ay innoo sahashaa in aan qabanno hawlo kala duwan.*



*Layli:*

*Weerahan mid walba ku buuxi eray ku habboon.*

1. *Subagga iyo saliidda waxa loo yaqaan*
2. *Cuntooyinka aan dufanka ka helno waxa ka mid ah*
3. *Dufanka waxa aan ka helnaa dhirta iyo____________ labadaba.*
4. *Sida kaarbohaydraytka ayaa aan dufanka ka helnaa __________*
5. *______________waxa ay innaga caawisaa in aan hawlo kala duwan qabano.*
6. *Caanaha waxa aan ka helnaa borotiin iyo __________labadaba.*



*Lafaha, ilkaha iyo dhiiggu waxa ay ka mid yihin qaybaha jirkeenna. Qeybahaani waxa ay u baahan yihiin in ay si fiican u dhismaan. Cuntooyinka ka qayb qaata dhismahooda waxa ka mid ah kalluunka, hilibka digaagga caanaha, ukunta, beerka iyo khudaarta kala duwan sida salladhka iyo kaabajka. cuntooyinka waxa ku jira cusbooyin loo yaqaan macaadin. Macdanaha ku jira cuntooyinkan waxa ka mid ah kaalsiyam, foosfaros, iyo birta.*





*Macdanahaasi lagama maarmaan ayaa ay u yihiin dhismaha lafaha, ilkaha iyo dhiigga. Macdanahan la'aantood qaybahani si fiican uma kori karaan.*

*Layli:*

1. *Magacow afar cunto oo aan ka helno macdanaha jirkeennu u baahan yahay.*
2. *Magacow laba ka mid ah macdanaha jirkeennu u baahan yahay ee aan cuntada ka helno.*
3. *Maxaa ay kaalsiyamka iyo foosfarku u taraan jirkeenna?*
4. *Ilkaha iyo lafaha dadku si fiican ma u dhismi karaan haddii aanay helin macdanaha foosfaras iyo kaalsiyam.*
5. *Sheeg ilkaha iyo lafaha ma ahee qaybaha kale ee jirkeenna ka mid ah ee macdanaha u baahan.*

## 3.7 Cudurrada ay dhaliso macdan la'aantu





*Si fiican ugu fiirso labadan sawir. Maxaa aad ku aragtaa sawirka kowaad? Sidee ayaa ay u eg yihiin lugaha wiilka sawirka koowaad.*

*Maxaa ay kula tahay in ay ku dhaceen lugihiisa?*

*Wiilkaasi ilkihiisa wax ma ka maqan yihiin?*

*Maxaa keena in ay ilkuhu sahal u daataan?*

*Sawirka labaad waxa ka muuqda wiil aad caato u ah.*

*Ma kula taḥay in wiilkaa jirkiisa dhiig badan laga heli karo?*


*Maxaa dhaliya dhiig la,aanta?*

*Layli:*

1. *Sheeg laba cudur oo macdan la'aanta jirka ka dhasha?*
2. *Maxaa keena in ay lafaha qofku qalqaloocsamaan?*



## 3.8 Faytamiinno



*Haddii qof cirridkiisu dhiigayaa u tago dhakhtar waxa uu kula talinayaa in uu cuno cuntooyinka ay ka mid yihiin liin dhannaanta.*

*Sidaa oo kale qofka durayga qaba waxa ay dhakhaatiirtu kula talisaa in uu cuno cuntooyinka ay ka midka yihiin liinta iyo bambeelmada. Qofka hamiinisowga qaba waxa la siiyaa cuntooyinka ay ka midka yihiin beer, dabacasaha, saliidda kalluunka iyo caanaha.*

*Dhammaan cuntooyinka sare waxa ku jira walax loo yaqaan faytamiinno.*


*Faytamiinnadu waxa ay jirkeenna ka ilaaliyaan cudurrada. Cuntooyinka faytamiinnadu ku jiraan qaarkood waxa laga helaa dhirta, qaarkoodna waxa laga helaa xayawaannada.*

*Layli:*

1. *Magacow afar cunto oo laga helo faytamiinno.*
2. *Sheeg laba cunto oo ay faytamiin ku jirto oo dhirta laga helo.*
3. *Sheeg laba cunto oo ay faytamiin ku jirto oo xayawaannada laga helo.*
4. *Waa maxay ahmiyadda ay faytamiinnadu u leeyihiin jirkeenna?*
5. *Sheeg laba cunto oo qofka hamiinisowga qaba la siiyo.*



## 3.9 Xubnaha cuntada ee qofka



*Aad ugu fiirso sawirkan sare. Maxaa aad ku aragtaa?*

*Cuntada aan cunnaa si ay jirkeenna u gasho waxa ay sii martaa xubno kala duwan. Sheeg xubinta ugu horraysa. Maxaa cuntada ku dhaca inta ay afka ku jirto? Magacow xubinta labaad ee ay cuntada sii marto? Tilmaan meesha hungurigu jirkaaga kaga yaallo, halkee ayaa ay cuntadu tagtaa marka ay hunguriga dhaafto? Halkee ayaa ay calooshu jirkaaga kaga taal?*

*Sawirka sare ma ka tilmaami kartaa caloosha?*

*Magacow xubinta ay cuntadu sii marto marka ay dhaafto caloosha? Ka tilmaan xubintaa sawirka sare.*

Mindhicirka weyn iyo midka yar midkee ayaa ay cuntadu ku horreysaa?

Maxaa loo yaqaan xubinta ku xigta mindhicirka weyn?


Ka tilmaan sawirka sare xubintaasi. Magacow xubinta ugu dambaysa ee cuntada wasakhda ahi marto marka ay jirkeenna ka baxayso.

Layli:

1. Magacow afar xubnood oo ka mid ah xubnaha ay cuntadu marto ee jirka dadka.
2. Maxaa loo yaqaan xubinta u dhaxaysa caloosha iyo afka ee ay cuntadu marto?
3. Magacow xubinta caloosha ku xigta ee ay cuntadu marto.
4. Maxaa ay ku kala duwan yihiin mindhicirka weyn iyo midka yar?
5. Halkee ayaa uu malawadku kaga yaal qofka?
6. Sawir ku muuji xubnaha cuntadu marto ee qofka.








Isku fiiri muraayad adiga oo si fiican afka u kala furaya.

Maxaa aad aragtaa? Immisa ilkood ayaa aad leedahay?

Ilkahaagu ma isu wada eg yihin, mise waa ay kala duwan yihiin?

Immisa nooc ayaa aad u qaybin kartaa ilkahaaga?

Maxaa loo yaqaan kuwa ugu soo horeeya?

Sheeg magacyada qaybaha kale. Ilkuhu wax faa'iido ah ma kuu leeyihiin? Sharax faa'iidada ay kuu leeyihiin. Marka aad wax cunayso ilkuhu ma isku shaqo ayaa ay qabtaan mise waa ay kala duwan yihiin?

Si fiican u sharax arrintaasi. Noocee ayaa aad adeegsataa marka aad hilibka goosanaysid? Maxaa ay gowsuhu qabtaan?

Layli:

Dhammaystir weerahan soo socda:

1. Waxa aan leeyahay______________ilig.
2. Ilkahaygu waa______________nooc oo kala duwan.
3. Cuntada waxa aan ku goostaa______________waxa aanan ku calashadaa______________
4. Qofka weyn ilkihiisu waa ay ka______________yihiin kuwa qofka yar.
5. Waxtarka ilkuhu innoo leeyihiin waxa ka mid ah



## 3.11 Cudurrada ku dhaca xubnaha cuntadu marto




Si fiican ugu fiirso sawirradan sare. Sharax sawir kasta waxa uu muujinayo, wax xiriir ahi ma ka dhexeeyaa sawirradan? Si fiican u sharax waxa ay muujinayaan sawirradani. Marka uu qofku rabo in uu wax cuno waxa habboon in uu gacmaha dhaqdo. Waa maxay sababtu? In cuntada iyada oo af bannaan laga tago iyo in la daboolo midkee ayaa habboon? Waa maxay sababtu? Xubnaha cuntadu marto ee qofka waxa ku dhaca cudurro badan. Wax ka sheeg cudurradaasi?


Tilmaan waxyaabaha cudurradaasi keena. Sharax siyaabaha looga hortagi karo cudrradaasi.

*Layli:*

1. *Sheeg laba cudur oo ku dhaca xubnaha cuntada marto ee qofka.*
2. *Magacaw laba xayawaan oo keena cudurrada ku dhaca xubnaha cuntadu marto ee qofka.*
3. *Sheeg laba siyaabood oo la iskaga ilaalin karo cudurradaasi.*
4. *Ma habboon tahay in la cunaa khudaar aan la dhaqin? Sharax sababta.*
5. *Maxaa loogu baahan yahay in had iyo jeer guriga iyo agagaarkiisa ay nadiif noqdaan?*



## 3.12 Naqtiin "dadka iyo cuntada"



*Sawirkan waxa ka muuqda cuntooyin kala duwan. Sheeg mid walba magaceeda. U kala saar cuntooyinka kuwa jirkeennu ku koro, kuwo aan tamar ka helno iyo kuwo cudurrada innaga ilaaliya.*

*Cuntooyinkan u kala saar kuwa borotiin laga helo, kuwo kaarbohaydrayt laga helo, kuwo dufan laga helo, kuwo macaadin laga helo iyo kuwo faytamiinno laga helo. Cuntooyinkan ma ku jiraan kuwo laba nooc sida borotiin iyo macdan laga wada helaa? Sheeg magacyadooda iyo mid walba labada nooc ee laga helo.*


*Layli:*


*Buuxi tushan adiga oo adeegsanaya cuntooyinka degaankiinna laga helo.*

| *Cunto* | *Borotiin* | *Kaarbohaydrayt* | *Dufan* | *Macaadin* | *Faytamiin* |
|---|---|---|---|---|---|
| *Caano* | | | | | |
| | | | | | |
| | | | | | |
| | | | | | |
| | | | | | |
| | | | | | |
| | | | | | |
| | | | | | |
| | | | | | |
| | | | | | |
| | | | | | |
| | | | | | |
| | | | | | |
| | | | | | |








*Sawirradani waxa ay muujinayaan laba degaan oo kala duwan, labada degaanba waxa ka muuqda dhir. Maxaa ay ku kala duwan tahay dhirtaasi? Maxaa keenay kala duwanaanta? Hore waxa aad u soo baratey in ay dhirtu noole tahay. Tiri astaamaha muujinaya in ay dhirtu noole tahay. Dhirta oo dhammi ma leedahay astaamahaasi. ma jiraan dhirta ma ahee waxyaabo kale oo leh astaamahaasi? Maxāa ay yihiin walxahaasi? Maxaa la isku yiraahdaa dhirta iyo xayawaanka oo wada jira? Tiri waxyaabaha ay dhirtu u baahan tahay si ay u noolaato.*

*Layli:*

1. *Sheeg saddex waxyaabood oo ay dhirtu u baahan tahay si ay u noolaato.*
2. *Sheeg dhirta biyaha hesha iyo midda aan helin ta hor baxda.*
3. *Sheeg saddex waxyaabood oo nooluhu u baahan yahay?*
4. *Sheeg astaamaha noolayaasha oo dhammi ay wadaagaan.*
5. *Dhirtu ma tarantaa sida xayawaanka?*




## 4.2 Dhirtu carro ma u baahan tahay?




*Carruurtani waxa ay samaynaysaa tijaabo si ay u hubiyaan in ay dhirtu u baahan tahay carro. Samee adiguna tijaabadan.*

*Soo qaado saxan, dhalo af ballaaran, carro, dhagxaan, iniinyo digireed iyo biyo.*


*Labada weel mid carrada ku shub midka kalena dhagxaanta. Labada weel midba hal iniin ah ku rid.*



*Carrada saxanku ha noqoto mid laga soo qoday meel beer ah. Biyo ku shub dhalada. Ha wada buuxin dhalada. Waraabi iniintii saxanka ku jirtay. Had iyo jeer biyaha aad labada weel ku shubaysaa ha is le'ekaadaan. Fiiri maalin walba weelasha.*



*Dhawr maalmood ka dib labadii weel waxa ka soo baxaya labada geed. Labada geed waxa ay noqdeen sidan. Ma isku midbaa labada geed mise waa ay kala duwan yihiin? Dhirtii aad abuurtay ma u baxday sidan oo kale.*



*Muddo ka dib labadii geed waxa ay noqdeen sidan.*


*Maxaa ay ku kala duwan yihiin labada geed. Waa maxay sababta?*

*Layli:*


1. *Immisa maalmood ayaa ay digirtii aad abuurtay ku soo biqishay?*
2. *Labadii weel ma isku mar ayaa ay digirtu ka soo wada biqishay?*
3. *Digirtii aad dhagxaanta ku beertay iyo digirtii aad carrada ku beertay middee ayaa si fiican u baxday? Waa maxay sababta?*
4. *Dhirtu ma u baahan tahay carro si ay u baxdo?*




## 4.3 Dhirtu biyo la'aan ma bixi kartaa?




*Samee tijaabadan si aad u hubisid in ay dhirtu biyo la'aan bixi karto iyo in kale. Soo qaado saddex koombo oo waaweyn, lix iniinyood oo galley ah, carro aad meel beer ah ka soo qodday iyo biyo.*




*Saddexda koombo mid walba ku shub carro isle'eg.*
*Iniinyaha galleyda koombo walba ku rid laba xabbo.*
*Koombooyinka laba ka mid ah biyo isku mid ah ku shub.*
*Koombooyinka oo dhan dhig meel qorrax ah.*



*Labadii koombo ee aad markii hore biyaha ku shubtay, maalin kasta biyo ku shub. Maxaa ku dhacay iniinyihii aad biyaha ku shubtay? Maxaa ku dhacay iniinyihii aanad biyaha ku shubin?*



*Labadii koombo ee aad biyaha ku shubtay waxa ka soo baxay mid walba laba geed. Labada koombo mid ka mid ah maalin walba wara-abi, Midna ha waraabin.*




*Maxaa ku dhacay dhirtii la waraabiyey? Maxaa ku dhacay dhirtii aan la waraabin? Labada geed ee sawirkan ka muuqda maxaa ay ku kala duwan yihiin? Midkee ayaa tilmaamaya geedkii la waraabiyey? Midkee ayaa tilmaamaya geedkii aan la waraabin?*

*Layli:*


1. *Iniinyihii la waraabiyey iyo kuwii aan la waraabin kuwee ayaa soo baxay?*
2. *Maxaa ku dhacaya iniinyaha haddii ay biyo waayaan?*
3. *Dhirtu ma noolaan kartaa biyo la'aan?*



## 4.4 Dhirtu hawo la'aan ma noolaan kartaa?




*Siaad u hubisid in ay dhirtu hawo u baahan tahay marka ay baxayso samee tijabadan. Soo qaado laba kiish oo ah bacda lagu keeno dacaska, carro aad ka soo qaadday meel beer ah iyo iniinyo digireed. Hubi in aan labada bacood midna daloolin.*



*Labada kiish mid walba carro ku shub ilaa kala bar. Ka dib mid walba ku beer hal iniin oo digir ah. Maalin walba waraabi ilaa ay si fiican u soo baxayaan oo uu dhererkoodu taako noqonayo.*



*Labadii kiish midkood afka ka xir oo saliid ka mari afkii xirnaa si ayna hawadu u galin. Meel ammaan ah dhig labada geed. Fiiri waxa ku dhaca dhirtii labada kiish ka dhex baxaysay.*




*Wax kala duwanaan ah ma ku aragtaa labadii geed?*

*Layli:*


1. *Maxaa ku dhacay geedkii hawada laga xiray dhawr maalmood ka dib?*
2. *Dhirta hawada hesha iyo dhirta aan helin midkee si fiican u baxda?*
3. *Dhirtu hawo la'aan ma noolaan kartaa?*



## 4.5 Dhirtu ma u baahan tahay ilayska qorraxda?





*Waxyaabaha ay dhirtu u baahn tahay si ay u baxdo waxa ka mid ah ilayska qorraxda. Si aad u hubisid samee tijaabadan. Waxa aad u baahan tahay laba bacood, iniinyo galley iyo carro. Iniinyaha u beer sidii tijaabadii hore.*




*Maalin walba waraabi iniinyaha ilaa ay si fiican uga soo baxayaan. Labada bacood mid walba waxa ka soo bixi geed sida sawirka labaad ka muuqata. Waraabi geedaha.*




*Dhawr maalmood ka dib labada geed midkood dhig meel qorrax ah. Geedka kale ku xir armaajo ama kabar si aad ilayska qorraxda uga ilaalisid.*



*Maalin walba aad ugu fiirso labad geed.*


*Wax kala duwanaan ah ma ku aragtaa labada geed?*

*Layli:*

1. *Geedkii aad qorraxda dhigtay iyo kii aad mugdiga dhigtay midkee ayaa si fiican u baxay?*
2. *Haddii aanay dhirtu helin ilayska qorraxda maxaa ku dhacaya?*
3. *Dhirtu qorrax la'aan ma noolaan kartaa?*







*Sawirka sare aad ugu fiirso. maxaa kaaga muuqda sawirka?*


*Tiri qaybaha geedku ka kooban yahay. Magacaw qayb kasta oo geedka ka mid ah. Immisa qaybood oo geedka ka mid ah ayaa dhulka ka sarreeya? Immisa qaybood ayaana dhulka ka hooseeya?*

*Magacaw qaybta ugu sarreysa ee geedka. Geedaha oo dhammi ma leeyihiin qaybahaas oo dhan?*

Layli:

1. Qaybaha geedka ee aad taqaan waa immisa?
2. Xididku geedka halkee ayaa uu kaga yaallaa?
3. Magacaw qaybaha geedka ee u dhexeeya xididka iyo ubaxa.
4. Geedaha oo dhammi caleemo ma leeyihiin?
5. Qaybta geedka ka mid-ah ee ubaxa iyo caleemaha kor u haysa maxaa loo yaqaan?





Aad ugu fiirso sawirrada kor ka muuqda. Xididdada sawirka ka muuqdaa ma isku eg yihiin mise waa ay kala duwan yihiin?

Sharax kooban ka bixi faraqa u dhexeeya.

Magacaw mid kasta oo xididdada ka mid ah?

Xididkee ayaa dhulka si sahlan looga soo bixin karaa?


Magacaw laba geed oo xididdo kala duwan leh? Halkee ayaa uu xididku geedka kaga yaallaa? Xididdada oo dhammi ma dhulka ayaa ay ka hooseeyaan? Dhirta qaarkood waxa ay leeyihiin xidid miiqan. Qaar kalena xidid udub. Xidid udubka qaarkood waxa ay kaydiyaan cuntada waxaana lagu magacaabaa xidid bararsan.

Layli:

1. Immisa nooc oo xididdo kala duwan ah ayaa aad taqaannaa?
2. Magacaw geed leh xidid bararsan.
3. Magacaw geed leh xidid miiqan.
4. Magacaw geed leh xidid udub.
5. Xidid bararsani ma nooc ka mid ah baa xidid miiqan mise waxa uu ka mid yahay xidid udub.







*Xididdadu wax faa'iido ah ma u leeyihiin geedka?*

*Si aad uga jawaabtid su'aashaan samee tijaabada sawirka sare ka muuqata. Waxa aad u baahan tahay labo dhalo oo af ballaaran leh, laba biin, laba geed oo ilaa xididka la soo rujiyay iyo biyo.*

*Si taxadar leh uga dhaq carrada xididdada labada geedba.*

*Labada dhalo mid biyo ka buuxi tan kalena ha mamaato.*

*Labada geed mid walba biin ka dusi jirridda meel xididka wax yar ka sarraysa. Labada geed mid walba xididdada dhalo u geli sida sawirka sare.*


*Dhig labada geed meel bannaan ah. Dhowr saacadood ka dib fiiri labadii geed. Wax isbeddel ah ma ku aragtaa? Wax kala duwanaan ah ma ku aragtaa labada geed? Maxaa keenay isbeddelkaasi? Sidaa oo kale fiiri labada geed maalin ka dib. Maxaa ku dhacay labadii hadda? Tijaabadani ma tustay in waxtar xididdada u leeyihiin geedka? Si fiican u sharax.*

*Layli:*

1. *Qaybtee geedka dhulka ku haysa?*
2. *Halkee ayaa dhirtu biyaha iyo cuntada ka heshaa?*
3. *Qaybtee ayaa uu geedku biyaha iyo cuntada ka qaataa?*
4. *Maxaa ku dhacaya haddii geedka xididdada laga jaro?*



## 4.9 Jirridaha dhirtu ma isku midbaa?



*Hore waxa aad u soo baratay in jirriddu ka mid tahay qaybaha geedka. Halkee ayaa ay jirriddu kaga taal geedka? Jirridaha dhirta kala duwani ma isku midbaa mise waa ay kala duwan yihiin? Si aad su'aalahan uga jawaabto samee baaristan. Adiga iyo dhowr arday oo ka mid ah fasalkiinna u baxa agagaarka dugsigiinna. Aad ugu fiirsada dhirta ku taal halkaa. Geed walba fiirsha qaybihiisa. Dhammaan dhirtasi ma leeyihiin jirrid? Maxaa ay ku kala duwan yihiin jirridaha dhirtaasi?*

*Taabo jirridda dhowr geed oo dhirtaas ka mid ah. Wax kala duwanaan ah ma dareentay? Tilmaan ka bixi kala duwanaantaas.*


*Layli:*

*Weerahan meelaha bannaan mid walba eray ku habboon ku buuxi.*

1. *Dhirta kala duwani waxa ay leedahay jirrido kala*__________
2. *Jirridaha dhirta qaarkood kor ayaa ay u baxaan qaarna*__________
3. *Jirridda geedka qaruhu waxa ay u baxdaa*__________.
4. *Dhirta qaarkood waxa ay leeyihiin jirrid ballaaran qaarna jirrid*____________________
5. *Jirridda dhirta qaar waxa ay leeyihiin jilif qaarna ma laha*____________________.



## 4.10 Maxaa ay jirriddu geedka u tartaa?



*Aad ugu fiirso sawirkan. Maxaa uu wiilku samaynayaa? Ma sheegi kartaa jidka ay biyaha wiilku dhulka ku shabayaa marayaan.*

*Maxaa uu muujinayaa jidkaasi?. Geeedku biyo la'aan ma noolaan karaa? Qaybtee geedka biyaha dhulka uga soo nuugta? Qaybtee biyaha ka qaadda xididdada oo caleemaha iyo ubaxa gaarsiisa? Haddii aanu geedku jirrid lahayn biyuhu caleemaha iyo ubaxa ma gaari karaan? Waxtar kale jirriddu ma u leedahay geedka? Qaybtee ayaa ay laamaha iyo caleemuhu ka baxaan?*


*Maxaa loo yaqaan qaybta geedka ee laamaha, ubaxa iyo caleemaha kor u haysa?*

*Layli:*

1. *Halkee ayaa ay jirriddu kaga taal geedka?*
2. *Maxaa loo yaqaan qaybta geedka ee biyaha ka soo qaadda xididdada ee gaarsiisa caleemaha iyo ubaxa?*
3. *Sharax ka bixi habka biyuhu ku gaaraan qaybaha geedka?*
4. *Sheeg laba faa'iido oo ay jirriddu u leedahay geedka.*
5. *Jirridda iyo xididka midkee ayaa biyaha dhulka ka soo nuuga?*








*U baxa adiga iyo saaxiibbadaa dugsiga agagaarkiisa meel ay dhir badan oo kala duwani ku taal. Aad ugu fiirsada caleemaha dhirtaasi. Geed walba hal caleen oo keliya ka soo gooya.*

*Caleemaha aad soo gurteen kula soo noqda fasalka.*

*U kala qaybiya caleemahaas dhowr kooxood idinka oo eegaya astaamaha ay wadaagaan sida in ay waaweyn yihiin iyo in ay yar yar yihiin.*

*Sidaas oo kale waxa aad ku kala qaybin kartaan midabkooda iyo qaabkooda sida in ay leeyihiin caaro dhuuban ama mid wareegsan.*

*Sidaas oo kale waxa aad ku kala qaybin kartaa in ay leeyihin dhogor iyo in kale.*

*Aad ugu fiirso caleemaha ka muuqda sawirka labaad. Maxaa ay ku kala duwan yihiin caleemahaasi? Caleemahaasi waxa ku yaalla xarriiqyo yar-yar. Caleemaha qaarkood waxa ay leeyihiin xarriiqyo barbarro ah, kuwa kalena waxa ay leeyihiiin xarriiqyo aan barbarro ahayn.*


*Caleemaha aad soo gurteen ma ku jiraan kuwa leh xarriiqyo barbarro ah? Magacaw geed ka mid ah kuwaas. Sidaas oo kale u fiirso caleemaha in ay ku jiraan kuwo aan lahayn xarriiqyo barbarro ah.*

*Layli:*

1. *Sheeg saddex astaamood oo ay caleemaha dhirtu ku kala duwan yihiin.*
2. *Sheeg laba astaamood oo ay caleemaha galleyda iyo digirtu ku kala duwan yihiin.*
3. *Magacaw hal geed oo caleentiisu dhogor leedahay.*
4. *Magacaw laba geed oo caleemahoodu ayna lahayn xarriiqyo barbarro ah.*



## 4.12 Caleemuhu waxtar ma u leeyihiin geedka?



*Waxa aynnu soo aragnay waxtarka xididdada iyo jirriddu u leeyihiin geedka. Caleemuhu wax faa'iido ah ma u leeyihiin geedka? Si aan uga jawaabno su'aashan samee tijaabadan. Soo qaado saddex koombo oo waaweyn, carro meel beer ah aad ka soo qaadday, iniinyo digireed iyo biyo, saddexda koombo ku shub carro isle'eg ka dibna ku rid mid walba iniin digireed. Waraabi iniinyaha ilaa ay ka soo biqlaan. Immisa maalmood ayaa ay ku qaadatay iniinyaha si ay u biqlaan? Waraabi geedaha maalin walba.*

*Marka ay geeduhu waxooga koraan mid ka jar caleemaha oo dhan, midna caleemaha qaar. u dhaaf geedka saddexaad caleemihiisa oo dhan. Waraabi geedaha maalin walba. Fiiri geedaha maalin walba. Maxaa geed walba ku dhacay? Koritaankii geedka wax isbeddel ahi ma ku dhacay? Geedkee ugu korriimo fiican? Maxaa ay kula tahay sababta? Geedkii caleemaha laga wada guray iyo kii loo daayey midkee si fiican u baxay? Tijaabadani ma ku tustay in ay caleemuhu wax faa'iido ah u leeyihiin geedka?*

*Layli:*

1. *Halkee ayaa ay caleemuhu geedka kaga yaalliin?*
2. *Geedka caleemaha laga wada jaray iyo midka loo daayey midkee si fiican u baxay? Waa maxay sababtu?*
3. *Sheeg laba waxtar oo ay caleemuhu geedka u leeyihiin.*



## 4.13 Ubaxyada dhirtu ma isku mid baa?



*U baxa adiga iyo saaxiibbadaa kula fasalka ahi agagaarka dugsiga meel ay dhiri ku taal. Aad ugu fiirsada dhirtaasi. Ma leedahay dhirtaasi ubax? Si fiican ugu fiirsada ubaxyada ku yaal dhirta kala duwan. Ubaxyada kuwii isku nooc ah mid ka soo gooya. Dhirta ka ilaaliya gooynta. Keena fasalka ubaxyadii aad soo gurteen. Aad ugu fiirsada kala duwanaanta ubaxyada. Midabka ubaxyadu ma isku wada midbaa? Immisa midab oo kala duwan ayaa aad ku aragtaa ubaxyadii aad soo gurteen?*


*Maxaa kale oo ay ku kala duwan yiihin ubaxyadaasi? Aad ugu fiirso ubaxyada baaxaddooda, qaabkooda, urtooda iyo quruxdooda.*

*Layli:*

1. *Halkee ayaa uu ubaxu kaga yaal geedka?*
2. *Immisa midab ayaa aad ku aragtay ubaxyadii aad soo gurtay? Tiri magacyada midabbadaasi?*
3. *Sheeg afar astaamood oo ubaxyadu ku kala duwan yihiin.*
4. *Dhirtu sida ay u kala waaweyn tahay miyaa ay ubaxyadooduna u kala waaweyn yihiin?*
5. *Dhirtu had iyo jeer ma leedahay ubax?*







*Aad ugu fiirso sawirkan. Maxa aad ku aragtaa ubax? Ubaxu waxa uu leeyahay qaybo kala duwan. Qaybaha ubaxa waxa ka mid ah laace, ma-laace, ubbo-ubax iyo faxal-side. Fiiri sawirka sare qayb walba meesha ay ubaxa kaga taal. Qaybahaas ma ka tilmaami kartaa ubax-yada dhirta? U baxa adiga iyo saaxiibbadaa dugsiga agagaarkiisa meel ay dhir kala duwani ku taal. Dhammaan dhirtaasi ubax ma leeyihiin? Soo gooya dhawr ubax oo kala duwan ka dibna ku soo noqda fasalka. Kolba hal ubax garab dhiga sawirka buugga.*


Ubaxaasi ma leeyahay qaybaha sawirka ka muuqda oo dhan? Waa maxay midabka ma-laacuhu? laacaha ubaxaasi ma leeyahay midab? Sheeg midabkiisa. Halkee ayaa ay ubaxyadaa kaga yaalliin ubax-sidaha iyo ubbo-ubaxu?

*Layli:*

1. *Magacaw saddex qaybood oo ka mid ah qaybaha ubaxa.*
2. *Ubaxu ma leeyahay qaybo kale oo aan saddexdaa ahayn? Sheeg magacyadooda.*
3. *Maxaa loo yaqaan qaybta midabka qurxoon leh ee ubaxa?*
4. *Sawir ubax ay qaybihiisa oo dhammi muuqdaan adiga oo qayb walba mgaceeda ku muujinaya.*







*Eeg sawirkani. Waxa aad ku aragtaa miro kala duwan. Sheeg mid walba magaciisa. Marba laba mirood soo qaado. Tiri astaamaha ay ku kala duwan yihiin. Kolba astaan soo qaado sida:*


1. *Diirka, adoo eegaya adkaanta diirka, ma siman yahay mise kurtimo ayaa uu leeyahay? Midabkiisu waa maxay?*
2. *Qaybta la cuno ee miraha; ma isku midab baa? Dheecaan badan ma leeyahay? Sidee ayaa uu u dhadhamayaa?*
3. *Middi ku kala goo miraha, oo laba meelood oo isle'eg u kala dhig. Dabadeedna eeg midabka iniinyaha iyo inta iniinyood ee uu leeyahay mirahaasi iyo sida ay u habaysan yihiin.*

*Layli:*

1. *Sheeg saddex geed oo diirka mirihiisu siman yihiin.*
2. *Sheeg laba geed oo diirka mirihiisu ay kurtimo leeyihiin.*
3. *Ma sheegi kartaa miro laba diir leh?*
4. *Immisa geed ayaa aad taqaannaa oo mirihiisu laf-weyn leeyihiin?*







*Dhirtu waa noole. Nooluhu waa uu tarmaa. Dhirtu siyaabo kala duwan ayaa ay ku tarantaa. Dhirta qaarkood waxa ay ku tarantaa iniinyo. Kuwee ayaa ka mid ah dhirtaasi? Sidee ayaa ay u tarantaa digirtu? Samee tijaabadan: Soo qaado koombo weyn, carro meel beer ah laga soo qaaday, iniinyo digireed iyo biyo. Carrada ku shub koombada dhexdeeda. Waraabi carrada maalin walba adiga oo meel qorrax ah dhigaya. Aad u fiiri koombada maalin walba. Wax isbeddel ah ma aragtaa?*

*Dhawr maalmood ka dib waxa aad arki geed yar oo ka soo baxay carrada. Halkee ayaa uu ka yimid geedkaasi? Waraabi geedka yar ilaa uu si fiican uga koro. Ma yahay geedku digir mise waa geed kale? Tiri dhirta kale ee iniinyaha ku taranta.*

*Layli:*


*Weerahan mid walba meesha bannaan ku buuxi eray ku habboon.*

1. *Dhirtu sida xayawaanka waa noole________________*
2. *Astaamaha____________________ waxaa ka mid ah taranka.*
3. *Dhirtu waxa ay ku________________ siyaabo kala duwan.*
4. *Dhirta qaarkeed waxa ay ku tarantaa____________________*
5. *Dhirta iniinyaha ku taranta waxa ka mid ah:*

   *b)____________ t)____________ j)____________ x)____________*



## 4.17 Dhirta tallaalka ku taranta



*Waxa aan soo barannay in dhirta qaarkood iniinyo ku taranto. Maxaa ka mid ah dhirtaasi? Dhirta oo dhammi ma iniinyo ayaa ay ku baxdaa? Weligaa ma aragtay moos, basal iyo bataati baxaya? Sidee ayaa loo beeraa dhirtan? Aan samayno tijaabadan: Waxaa aan u baahan nahay bakeeri, xabbad basal ah, laba qori oo dhuudhuuban iyo biyo? Labada qori basasha labadeeda dhinac ka taag. Basasha bakeeriga dabada u geli sida sawirka sare ka muuqata.*


*Bakeeriga biyo ku shub ilaa ay soo gaaraan basasha gunteeda. Maalin walba biyo ku shub si biyaha heerkoodu aan hoos ugu dhicin. maalin walba tijaabada. Wax isbeddel ah ma ku aragtaa basasha?. Xididdo iyo caleemo ma ka soo baxeen basashii?. Dhinacee ayaa ay u baxeen? Ma taqaan dhir kale oo sida basasha tallaal ku bixi karta oo aan iniinyo u baahnayn?*

*Layli:*

1. *Magacow laba hab oo ay dhirtu ku taranto?*
2. *Magacow saddex geed oo tallaal ku bixi kara.*
3. *Dhirta tallaalka ku baxdaa ma u baahan tahay iniinyo si ay u taranto?*
4. *Qasabka Sonkortu iniinyo iyo tallaal midkee ayaa uu ku baxaa?*
5. *Mooska iyo galleyda midkee ayaa tallaalka ku baxa?*







*Sawirkan waxa ka muuqda dhir kala duwan. Sheeg mid walba magaciisa. Dhirtu waa ay nooshahay sida xayawaanka. Maxaa ay dhirtu u baahan tahay si ay u noolaato? Sharax waxtarka ay dhirta u leeyihiin carrada, biyaha, hawada iyo iftiinka qorraxdu. Geedahani waxa ay leeyihiin astaamo ay wadaagaan iyo astaamo ay ku kala duwan yihiin.*

*Kolba laba geed is-garab dhig. Sharax astaamaha ay wadaagaan iyo kuwa ay ku kala duwan yihiin. Aad ugu fiirso geed walba qaybihiisa. Magacaw geed walba qaybaha uu ka kooban yahay.*

*Tilmaan qayb walba meesha ay geedka kaga taal.*

Sharax qayb walba waxtarka ay geedka u leedahay.

Layli:

Weerahan midii sax ah horteeda ku qor calaammadda (✓), middii khalad ahna ku qor calaamadda ( X ).


1. Dhirtu waa noole sida dadka iyo xayawaannada kale ( ).
2. Dhirtu uma baahna hawo si ay u noolaato ( ).
3. Qaybaha geedka ugu waaweyni waa xididdada iyo ubaxa oo keliya ( ).
4. Waxtarka xididdadu geedka u leeyihiin waxa ka mid ah in ay biyaha dhulka ka soo nuugaan ( ).
5. Caleemuhu geedka korrimadiisa waxba uma taraan ( ).








Si fiican ugu fiirso sawirkan. Waxa aad ku aragtaa xayawaanno kala duwan. Sheeg mid walba magaciisa. Xayawaannadan immisa ayaa deegaanka biyaha ku nool? Sheeg magaciisa. Halkee ayaa ay kuwa kale ku nool yihiin? Sheeg astaamaha ay wadaagaan iyo kuwa ay ku kala duwan yihiin xayawaannadani.




Sawirka labaad waxa aad ku aragtaa cuntooyin kala duwan. Sharax waxtarka cuntadu innoo leedahay. Cuntooyinkan u kala qaybi kuwa laga helo borotiin, kaarboohaydrayt, dufan, macdan iyo fiitamiin. Sharax nooc walba waxtarka uu jirkeenna u leeyahay.




Aad ugu fiirso sawirkan. Waxa ka muuqda dhir badan. Sheeg geed walba magaciisa. Tiri astaamaha ay wadaagaan iyo kuwa ay ku kala duwan yihiin. Dhirtan ma ku jiraa geed ka baxa lamadegaanku? Sheeg magaciisa.

1



*Sawirka sare aad ugu fiirso, maxaa aad ku aragtaa?*
*Waa maxay cimilo-gooreedka degaanka kor ka muuqda?*

2



*Maxaa aad u malaynaysaa cimilo-gooreedka degaanka sawirka sare ka muuqda in ay tahay?*



*Maxaa ay ku kala duwan yihiin cimilo-gooreedka labada degaan ee ka muuqda bogga 102aad? Magacow cimilo-gooreed ka duwan kuwa ka muuqda boggaas? Cimilo-gooreed waa astaamaha degaaneed ee ka dhaca meel gaar ah waqti go'an, sida roobka dabaylaha, kulaylka qorraxda, qaboobaha iwm. Waxaana meel cimilo-gooreedkeeda lagu magacaabaa astaamaha degaaneed ee ka muuqda, sida meeshaas cimilo-gooreedkeedu waa kulayl. U baxa adiga iyo saaxiibbadaa dugsiga bannaankiisa, ka dibna u fiirsada kulaylka qorraxda, dabaylaha, muuqaalka cirka sida in uu daruuro leeyahay iyo in kale, iyo haddii uu daruuro leeyahay nooca ay yihiin. Sidaas oo kale aad ugu fiirsada dhulka, sida qoyaanka, cawska iwm. Waxyaabahaas oo dhami waxa ay saameeyaan cimilo-gooreedka.*

*Layli:*

1. *Maxaa ay u badan tahay cimilo-gooreedka meelaha lama degaannada ahi?*
2. *Magacow waxyaabaha saameeya cimilo-gooreedka?*
3. *Waa sidee cimilo-gooreedka degmadiinu maanta?*
4. *Cimilo-gooreedka meeli ma joogtaa? Waayo?*
5. *Sharax erayga cimilo-gooreed.*



*U baxa adiga iyo saaxiibbadaada kula fasalka ahi bannaanka dugsiga, aadna ugu fiirsada cimilo-gooreedka agagaarka dugsigiinna. Koox koox isu qaybiya ka dibna koox waliba ha qorto cimilo-gooreedka iyaga oo eegaya kulaylka qorraxda, dabaysha, qabowga, roobka, daruuraha iwm. Shalay iyo maanta cimilo-gooreedka degmadiinu ma isku midbaa? Toddobaadkan aynu soo dhaafnay immisa maalmood ayaa cimilo-gooreedkoodu isku mid ahaa? Immisa ayaana cimilo-gooreedkoodu kala duwanaa? Ma sheegi kartaa cimilo-gooreedka bishani sida uu ahaa? Maxaa uu kaga duwanaa bishii hore?*




*Layli:*

*U sheeg ardayda in ay shaxda hoos ku xusan ku buuxiyaan wararka kala duwan ee toddobaadka iyaga oo raacaya habka loo buuxiyey maalinta kowaad.*

| Bisha | Hawo | Qorrax | Daruur | Roob | Dabayl |
|---|---|---|---|---|---|
| Maalin | deggan | kulayl | badan | tiix tiix | ma jirto |
| Sabti | | | | | |
| Axad | | | | | |
| Isniin | | | | | |
| Talaado | | | | | |
| Arbaco | | | | | |
| Khamiis | | | | | |
| Jimce | | | | | |

## 5.3 Sidee ayaa ay Daruuruhu u Samaysmaan?




*Weligaa daruur ma aragtay? Daruuruhu xaggee ayaa ay ka yimaadaan?*

*Maxaa aad u malaynaysaa in ay daruuruhu ka samaysan yihiin?*

*Sidee ayaa ay daruuruhu u samaysmaan?*

*Si aad su'aalahaas uga jawaabto samee tijaabadan. Waxa aad u baahan tahay, biyo, baraf, baaquli (madiibad) quraarad ka samaysan, dabool, dab iyo digsi jaandi ah. Digsiga jaandiga ah dhowr bakeeri oo biyo ah ku shub, ka dibna isaga oo daboolan dabka saar una daa ilaa ay biyuhu islaba rogaan. Marka ay biyuhu karaan ku shub baaquligii quraaradda ahaa, si deg-deg ahna u dabool adiga oo daboolka dushiisa baraf saaraya sida ka muuqata sawirka labaad ee bogga 106aad ee buuggaaga.*



*Biyuhu waa ay uumi bixi doonaan, ka dibna waxa qaboojin doona barafka daboolka dul saaran. Biyihii dhibco ayaa ay isu rogayaan, ka dibna waxa ay wax daruur u eg ku samyn doonaan biyaha iyo daboolka dhexdiisa. Habkaas oo kale ayaa ay daruuruhu u samysmaan.*


*Layli:*


1. *Daruuruhu maxaa ay ka samaysmaan?*
2. *Daruuruhu cirka miyaa ay ku yaallaan mise waa ay ka sokeeyaan?*
3. *Sheeg midabka daruuruhu nooca uu u badan yahay.*
4. *Sharax kooban ka bixi habka daruuruhu u samaysmaan.*
5. *Waqtiga kulaylaha ah iyo qaboobaha midkee daruuruhu samaysmi og yihiin?*



Daruuruhu waa ay noocyo badan yihiin. Noocan daruurta ka mid ah ee da'aya waxa loo yaqaan hogol. Hogoshu waa daruur xooggan oo da'aysa ama diyaar u ah markaas in ay da'do.

Daruurta ka muuqata sawirka labaad waxa loo yaqaan caad. Caadku waa daruur khafiif ah oo ballaaran oo js haysata, laakiinse aan wax roob ahi badanaa ka di'in. Midabkeeduna waa sida qiiqa.






Daruurta ka muuqata sawirkan saddexaad waxa loo yaqaannaa dhool. Dhoolku waa daruur buuran oo laxaad leh, hoosna iskaga siman, waxaana ay leedahay qaabka buuraha yaryar oo kale. Badanaaba dhoolka waxa laga fishaa in uu da'o.



Jaadadka daruuruhu kuma eka oo keliya kuwa aynu soo sheegnay. Waxa jira jaadad kale oo daruuro ah. Maxaa aad ka taqaanaa noocyada daruuraha? Ma sheegi kartaa daruuraha roob laga saadaalin karo iyo kuwa aan laga saadaalin karin.

Layli:


1. Magacaw inta jaad ee daruuro ah ee aad taqaano.
2. Caad iyo dhoolka midkee roob laga saadaalin karaa?
3. Xilliga guga daruuro noocee ah ayaa ku badan cirka?
4. Sharax kooban ka bixi jaadadka daruuraha, adiga oo sheegaya kuwa da'a, kuwa aan di'in, baaxaddooda, midabkooda iyo qaabkooda.
5. Si kooban uga faallood sida ay u kala sokeeyaan daruuruhu.



Si fiican u fiiri sawirka sare. Maxaa kaaga muuqda? Roobku sidee ayaa uu u samaysmaa? Roobku ma hawada ayaa uu ka yimaadaa mise meel kale? Kulka qorraxda ayaa ku dhaca badda, biyaha webiyada, balliyada iyo harooyinka, ka dibna waxa ay isku beddelaan uumi. Uumigaasi kor ayaa uu u kacaa waxaana uu ku qaboobaa hawada sare markaas ayaa uu noqdaa daruur. Daruurtaas ayaa biyo soo daysa, biyahaasna waxa lagu magacaabaa roob. Roobabku waa ay noocyo badan yihiin, waxaana ka mid ah mahiigaan, miraale, mayey, cir cadda, xays, xagaayo iyo kuwo kale. Magacaw roobabkaasi xilliyada ay kala da'aan. Waa maxay faraqa u dhexeeya xays iyo xagaayo.








U fiirso sawirrada kor ka muuqda. Maxaa ay kuu muujinayaan?

Ma sheegi kartaa sida ay Soomaalidu u cabbirto laxaadka roobka? Maxaa ay sameeyaan? Qalabkee ayaa ay adeegsadaan?

si aad uga jawaabto su'aalaha kor ku qoran aan samayno tijaabadan: U baxa adiga iyo saaxiibbadaa fasalka bannaankiisa laba maalmood oo kala duwan oo uu da'ay roob kala laxaad weyn.

Maalinta uu da'o roobka yari kolba laba arday oo idinka mid ah hoos ha u qodaan dhulka ilaa meesha ay ciid qallalan ka gaadhayaan, ka dibna cabbira inta raysku hoos uu dhulka u galay.


*Sidaas oo kale maalin roob weyn da'ayna cabbira inta raysku dhulka hoos u galay, idinka oo ku cabbiraya xubnaha farihiina, baabacada, dhudhun iyo gacanta oo dhan. Labada maalmood midkee raysku hoos u dheer yahay? Labada roob midkee laxaadkiisu weyn yahay? Sidee ayaa aad ku garateen?*

*Layli:*

1. *Laxaadka roobka meel ka da'ay sidee ayaa lagu gartaa?*
2. *Degaankiinna sidee ayaa looga cabbiraa roobka?*
3. *Maxaa loo adeegsadaa cabbiraadda roobka?*
4. *Roob rayskiisu hoos dhulka u galay xubin iyo mid uu dhulka u galay far midkee ayaa laxaadkiisu weyn yahay?*
5. *Sharax kooban ka bixi roobka aad hoos dhulka ugu gala magaciisa iyo habka uu u da'o.*







*Roob ayaa ka da'a degaankiinna xilliyada qaarkood. Roobabkaasi laxaadkooodu waa uu kala duwan yahay. Sidee ayaa aad u cabbiri kartaa roobabkaas, si aad u ogaato sida ay u kala laxaad weyn yihiin. Si aad uga jawaabto su'aalahaas samee tijaabadan:*

*Waxa aad u baahan tahay koombo, mastarad ama qori toosan oo leh cabbir sida aad ku aragto sawirka kowaad, waxa kale oo aad u baahan tahay dhalo yar iyo masaf af ballaaran leh sida ka muuqata sawirka labaad. Soo qaata adiga iyo saaxiibkaa labada roob-beege ee ku sawiran bogga 113aad ee buuggaaga. Taga meel bannaan ah oo yara taagan maalin roob da'ayo. Meeshii bannaanayd waxa aad ka qoddaan god yar, ka dibna waxa aad ku dhex riddaan dhaladii iyo masafkii.*

*Dhalada iyo masafka isku dhex jira ha wada aasina. In yar oo afka sare ah ha soo jeedaan si aanay dhibcaha biyaha ah ee ku dhacaya dhulku ugu soo noqon. Sidoo kale daasaddana dhiga meel u dhow. Marka uu qaado roobku waxa aad cabbirtaan inta biyo ku dhacday dhaladii, ka dibna qora heerka ay joogaan biyuhu. Biyihii daasadda (koombada) ku dhacayna waxa aad ku cabbirtaa mastarad, dabadeedna qora heerka ay joogsadaan.*

*Maxaa ay ku tusayaan biyaha koombada iyo dhalada ku dhacay?*

*Layli*

1. *Ma samayn kartaa roob-beege?*
2. *Sheeg qalabka lagu cabbiro roobka?*
3. *Maxaa loo dhigi waayey roob-beegaha meel dugsi ah ama geed hoostii ah? Sheeg sababta?*
4. *Maxaa dhalada iyo koombada loo dhigay meel bannaan oo taag ah?*







*Aad ugu fiirso sawirrada kor ka muuqda. Immisa walxood oo kala duwan ayaa aad ku aragtaa? Magacaw dhammaan walxaha ka muuqda sawirka. Walxaha sawirka ka muuqda maxaa ay muujinayaan?*

*Waa maxay dabayli? Maxaa ay hawada kaga duwan tahay?*

*Dabayluhu waxa ay ku kala duwan yihiin laxaadka. Dabayluhu sida ay u kala laxaad badan yihiin ayaa ay u kala waxyeello badan yihiin. Dabaylaha laxaadka badani dhirta ayaa ay rujiyaan, guryaha waa ay dumiyaan. Dabayshu walxaha ay ku dhacayso isku dhinac ayaa ay u dhaqaajisaa.*


Weligaa doonni ma aragtay? doonyaha kuwo ayaa matoor ku socda, kuwana shiraac ayaa ay leeyihiin. Doonyaha shiraaca leh maxaa wada? Marka ay dabayshu yar tahay iyo marka ay badan tahay midkee ayaa ay dheereeyaan?

Layli:

1. Waa maxay dabayli.
2. Wax ka sheeg waxyeellada dabayshu innoo leedahay?
3. Tusaale ka bixi waxtarka dabaysha.
4. Maxaa loo yaqaanna dabaysha inta aan roobku di'in ka soo horreysa?
5. Maxaa ay kaga duwan tahay dabaysha kale?







Aad ugu fiirso sawirka sare. Maxaa uu muujinayaa sawirkaasi.

Wiilka yar ee kursiga ku taagani maxaa uu samaynayaa?

Walxaha yar yar ee uu wiilka daadiyay ma isku dhinac ayaa ay u wada socdaan, mise qaarba dhinac gooni ah? Maxaa aad u malaynaysaa in walxahaasi ay dhaqaajinayaan? Si aad su'aalahaas uga jawaabto samee tijaabadan: Isku qaybiya dhowr kooxood.

Koox kasta oo idinka mid ahi ha soo diyaarsato xaashiyo la jar jaray oo yar yar iyo hal kursi.


U baxa barxadda dugsiga, ka dibna arday idinka mid ah oo sita cantoobo xaashiyihii yar yaraa ah ha isku dul taago kursiga sida ka muuqata sawirka, dabadeedna ha sii daayo xaashiyihii, intiina kalena u fiirsada jihada ay xaashiyuhu u socdaan. Kolba arday idinka mid ahi ha ku sameeyo sida ardaygii u horreeyey oo kale. Jihadee ayaa ay u socdaan xaashiyuhu? Ma isku jiho ayaa ay u socdaan? Jihadee ayaa ay dabayshu u socotaa?

*Layli:*

1. Sheeg laba siyaabood oo lagu garto jihada dabayshu u socoto.
2. Sannadka oo dhan dabayshu ma isku dhinac ayaa ay u socotaa?
3. Dabaysha waqooyi bari ka soo dhacdaa jihadee ayaa ay u socotaa?
4. Degmada aad ku nooshahay jihadee maanta dabayshu u dhacaysaa?
5. Magacaw jihooyinka kala duwan ee ay dabayshu ka soo dhacdo.







Aad ugu fiirso sawirrada sare, maxaa ay muujinayaan?

Sawirka koowaad maxaa uu muujinayaa? Maxaa ay ku kala duwan yihiin sawirka kowaad iyo labaad? Hadhka wiilka sawirka koowaad iyo hadhka gabadha sawirka labaad midkee dheer? Waa maxay sababtu? Qorraxda iyo hadhka wax xiriir ah ma ka dhexeeyaa? Hadhka walxuhu subaxa hore iyo barqadii midkee ayaa uu dheer yahay? Waa maxay sababtu? Weqtigee ayaa hadhka walxuhu ugu gaaban yahay? Si aad su'aalahaas uga jawaabto, sameeya adiga iyo saaxiibbadaa tijaabadan; Subaxnimada hore u baxa fasalka bannaankiisa, ka dibna kolba arday ha istaago meel bannaan ah oo siman, arday kalena mastarad ha ku cabbiro dhererka hadhkiisa, ka dibna meel ha ku qorto.


Marka ay duhurka gaarto, sidii tijaabadii hore oo kale isla ardaydii cabbirka hadhkoodu qornaa dib ha loo cabbiro, dabadeedna ha la soo saaro faraqa u dhexeeya cabbirka labadoodii hadh. Halkaa waxa aad ka dareemaysaa in hadhka iyo qorraxda xiriir ka dhexeeyo sidaas oo kale galabtii tijaabadan oo kale sameeya, ka dibna u fiirsada isbeddelka ku dhaca hadhka. Hadhka walxuhu meelo kala duwan ayaa uu maraa xilliyada kala duwan. U fiirso hadhka gurigiinna, sannadka oo dhan ma isku meel ayaa uu marayaa? Sidaas oo kale fasalkaaga u fiirso dhinaca daaqaduhu ku yaalliin, sannadka oo dhan qorraxdu ma isku meel ayaa ay ka martaa fasalka?

Layli:

1. Waqtigee ayaa hadhkaagu ugu dheer yahay?
2. Sharax kooban ka bixi sida xiriir uga dhexeeyo qorraxda iyo hadhka.
3. Waqtigee hadhkaagu ugu gaaban yahay?
4. Hadhka maxaa sameeya?
5. Haddii aan ilays jirin hadh ma jiraa?







Aad ugu fiirso sawirka sare, maxaa kaaga muuqda? Sawirkaasi maxaa uu muujinayaa? Biyaha dhalada ku jira haddii meel qorrax ah la dhigo, ma kor ayaa ay u kacayaan, mise hoos ayaa ay u dhacayaan? Waa maxay sababtu? Si aad arrintaas u hubiso samee tijaabadan:

Waxa aad u baahan tahay dhalo meel dhexaad ah oo af yar, dhuuxa qalinka biirooga oo nadiif ah, dhoobo, xanjo iyo daqiiq la qooyey kolba midka aad hesho, xaashi qiyaas leh iyo biyo midab leh (Biyaha waxa aad ku midabayn kartaa sacfaraan, asal, dhuxul, buluugga dharka, sibaaq iwm). Dhalada biyaha midabaysan ku shub, ka dibna waxa aad joojisaa biyaha meel afka u dhow sida ka muuqata sawirka.

Soo qaado dhuuxii qalinka biirooga ah, ka dibna waraaqdii cabbirka lahayd gees ka geli (sida carruurtu ay u samaysato abiteyda), dabadeedna afka u geli dhalada adiga oo ugu dhejinaya xanjo, dhoobo, daqiiq qoyan kolba kii aad hesho. Ha la dhigo dhalada meel qorrax leh. Muddo yar ka dibna ha la eego isbeddelka ku dhacay heerka biyuhu kaga aaddan yihiin warqadda cabbirka leh. Ha la dhigo dhalada meel qabow, dabadeedna sidii oo kale ha la calaamadeeyo heerka biyaha. Maxaa ugu wacan in uu isbeddelo heerka biyuhu? Kulaylka iyo qabowgu raad ma ku leeyihiin biyaha? Qabowga amase kulaylka walaxi ku sugan tahay ayaa loo yaqaan heerkul. Heerkulka walaxdu waxa uu noqon karaa kulayl amase qabow. Heerkulka waxaa lagu cabbiraa qiyaas tiro ah oo aynu baran doonno.

Layli:

1. Heerkulka walaxda, qorraxdu wax ma ka beddeshaa?
2. Biyaha tallaajad ku jira iyo kuwa dabka saaran ma isku heerkul baa? Midkee heerkulkiisu sarreeyaa?
3. Sharrax kooban ka bixi erayga heerkul.
4. Xilliyada kala duwan ee sannadka, heerkulkoodu ma isku midbaa?
5. Guriga daaqaadaha waaweyn leh iyo guriga aan daaqadaha lahayn midkee heerkulkiisu sarreeyaa?







Aad ugu fiirso sawirkan, maxaa kaaga muuqda? roobku waxa uu ka mid yahay waxyaabaha sameeya cimilo gooreedka. Immisa roob oo kala duwan ayaa degaankiinna laga helaa? Roobka subaxa hore da'a maxaa loo yaqaannaa? Xagaayadu xaggee ayaa ay ka da'daa?



Aad ugu fiirso sawirka labaad, maxaa uu muujinayaa? dabayshu waxa ay ka mid tahay waxyaabaha sameeya cimilo-gooreedka. Dabayshu ma jiho keliya ayaa ay ka soo dhacdaa? Dabayluhu waxtar iyo waxyeelloba waa ay inoo leeyihiin. Wax ka sheeg waxtarka iyo waxyeellada ay dabayluhu inoo leeyihiin



Cimilo-gooreedka waxyaabaha sameeya waxa ka mid ah qorraxda. Qorraxdu waxa ay kaalin weyn ka qaadataa heerkulka walxaha. Wax xidhiidh ahi ma' ka dhexeeyaan qorraxda iyo dhinaca lidka ku ah hooska Midkee ayaa uu ka muuqdaa? Marka ay duhurka tahay hadhka walaxdu dhinacee ayaa uu ka muuqdaa? Waa maxay sababtu?

Maxaa ka mid ah waxyaabaha kale ee sameeya cimilo gooreedka?

Waa maxay heerkulku?

Layli:

1. Magacow noocyada dabaylaha kala duwan ee aad taqaan.
2. Xagaayaha iyo Xayska midkee xeebaha waqooyi ka da'a?
3. Sharrax kooban ka bixi sida roobku u samaysmo.
4. Sharrax xiriirka ka dhexeeya qorraxda iyo hadhka.
5. Ereyadan mid walba sharrax kooban ka bixi:

   b) Cimilo-gooreed


   t) Hadh (hoos)

   j) Heerkul

   x) Dabayl.







Aad ugu fiirso sawirka sare. Maxaa kaaga muuqda?

Biyaha ka muuqdaa xaggee ayaa ay ka yimaadaan?

Ma jiraan meelo kale oo biyo laga helaa? Biyaha berkadaha ku jira iyo kuwa ceelashu ma isku meel ayaa ay ka yimaadaan? Biyuhu noolayaasha ma ku dhex jiraan? Biyuhu waxa ay ka yimaadaan daruuraha iyaga oo roob ah, ka dibna waxa ay galaan waraha, balliyada, ceelasha, webiyada, badaha iyo durdurrada. Dhirta iyo xayawaankuba biyo la'aan ma noolaan karaan, sidaa darteed dhirta iyo xayawaankuba biyo ayaa laga helaa. Weligaa qare ma cuntay? Maxaa aad ku dhex aragtay? Ma sheegi kartaa sida xayawaanka biyo ugu dhex jiraan?




*Cuntada aynu cunno biyo ma ku jiraan? Cuntooyinka aynu cunno kuwee aad filaysaa in ay biyuhu ku badan yihiin? Sidee ayaa aad u caddayn kartaa in cuntooyinka biyo ku jiraan? Si aad ugu jawaabtid su'aalaha samee tijaabada soo socota: Soo qaado qare ama liin, ka dibna laba u kala jar. Labada jeex midkood miisaan, meelna ku qor cabbirka culayska kuu soo baxa. Jeexii aad miisaantay meel qorrax leh dhig una daa ilaa uu qallalo, ka dibna mar labaad miisaan, meelna ku qor cabbirka kuu soo baxa. Labada cabbir keebaa weyn? Sheeg sababta?*








*Aad ugu fiirso sawirrada sare. Maxaa ay muujinayaan? Ma taqaannaa siyaabo kale oo loo kaydin karo biyaha? Degaankiinna sidee ayaa biyaha looga kaydiyaa? Magacaw meelaha kala duwan ee lagu kaydiyo biyaha? Biyuhu waxa ay kaalin muhiim ah kaga jiraan nolosha. Dhirta iyo xayawaankuba waxa ay u baahan yihiin biyo, sidaa darteed waxa lama huraan ah in la kaydsado lana dhaqaaleeyo biyaha. Degaannada kala duwan mid walba si gooni ah ayaa biyaha loo kaydsadaa. Magaalooyinka waaweyn waxa biyaha lagu kaydsadaa haamo waaweyn oo dhulka ka sarreeya, oo badanaaba laga sameeyo bir ama shub sibidh ah.*


*Dadka reer miyiga ahi waxaa ay biyaha ku kaydsadaan berkado, harooyin iyo balliyo. Biyahaasi dadku waxa ay isticmaalaan xilliyada biyo la'aantu jirto, halkaas oo ay dadkuna ka cabbaan, xoolahana ka waraabiyaan.*

*Layli:*


1. *Biyaha maxaa loo kaydiyaa?*
2. *Immisa siyaabood ayaa biyaha loo kaydiyaa?*
3. *Magacow meelaha reer miyigu biyaha ku kaydiyaan?*
4. *Biyaha la kaydiyo goormaa ay dadku isticmaalaan?*
5. *Sharax faraqa u dhexeeya barkad, war iyo balli.*



## 6.4 Astaamaha biyaha




*Biyo weel ku jira mid kale ma ku shubi kartaa? Midho weel ku jira mid kale ma ku shubi kartaa? Maxaa faraq ah ee u dhexeeya midhahaas iyo biyaha aad mid walba weelkiisii ka shubtay? Biyahaas iyo midhahaas midkee ayaa dareeray marka aad shubaysay? Biyuhu waxa ay leeyihiin astaanta dareerenimo. Biyuhu qaab go'an ma leeyihiin? Biyaha dhalada ku jira iyo kuwa bakeeriga ku jiraa ma isku qaab baa?*




*Si aad u ogaato biyuhu in aanay qaab go'an lahayn samee tijaabadan: Biyo soo qaado marna bakeeri ku shub marna dhalo. Labada goor biyuhu ma isku qaab eg yihiin? Biyuhu mar walba waxa ay yeeshaan qaabka weelka ay ku jiraan.*

*Weligaa sharaab aan biyo ahayn ma cabtay sida fiinto, oraanj, iwm? Maxaa aad u malaynaysaa in uu midabkooda beddelay?*



*Biyuhu walxaha qaar ayaa ay ku milmaan.Tusaale: Buluugga dharka lagu dhaqo marka biyaha lagu dhex rido sidee ayaa midabkoodu noqdaa? Biyuhu waxa ay yeeshaan midabka walxaha ay ku milmaan.*

*Astaamahaas aynnu soo sheegnay iyo kuwo kaleba waa ay leeyihiin biyuhu. Si aad u hubiso isku day in aad samaysmo dhammaan tijaabooyinka ku yaalla bogga 129aad ee buuggaaga. Isku day in aad sheegto astaamo kale oo ay leeyihiin biyuhu adiga oo tijaabo adeegsanaya.*

*Layli:*

*Weedhahan kii run ah ku qor "+" kii been ahna ku hor qor "o".*

1. *Biyuhu waxa ay leeyihiin qaab go'an (_________).*
2. *Biyuhu waxa ay leeyihiin astaanta dareeraha (_________).*
3. *Biyuhu walax kasta waa ay ku milmaan (_________).*
4. *Biyaha haddii aad loo qaboojiyo waxa ay noqdaan baraf (_____).*
5. *Biyaha haddii la kululeeyo wax isbeddel ahi kuma dhaco(_____)*



## 6.5 Raadka kulku ku leeyahay biyaha




*Aad ugu fiirso sawirka sare. Maxaa ay samaynayaan ardayda ka muuqata? Weligaa biyo dab ma saartay? Xaddiga biyaha wax isbeddel ahi ma ku dhacay? Dabku wax isbeddel ah ma ku sameeyay biyaha? Si aad uga jawaabtid, samee tijaabadan:*

*Soo qaado koombo biyo ku jiraan, ka dibna dul saar dab sida ka muuqata sawirka 1aad ee bogga 131aad. Marka aad muddo biyaha dabka u deyso, maxaa isbeddel ah ee biyaha ku dhacay? Xaddigii biyuhu ma is dhimay? Biyuhu marka aad loo kululeeyo waa ay uumi baxaan. Wax isbeddel ah oo kale kulku biyaha ma ku sameeyaa? Bal isku day in aad samayso tijaabadan:*


*Soo qaado jalmad, ka dibna dab dul saar sida ka muuqata sawirka labaad ee bogga 131aad. Marka jalmadda muddo dabka saarnaado maxaa ku dhacaya? Naaska (dhuunta) wax biyo ahi ma ka yimaadeen? Biyahaa maxaa daadinaya ayaa aad u malaynaysaa? Biyuhu marka la kululeeyo waa ay fidaan.*

*Layli:*

1. *Maxaa qallajiya dharka marka la maydho?*
2. *Haddii baaf (tashti) biyo ah meel qorrax ah la dhigo, maxaa isbeddel ah oo ku dhacay biyaha?*
3. *Halkee ayaa ay tagaan biyaha balliyada iyo harooyinku marka ay guraan?*
4. *Sheeg sababta biyaha jalmadda ku jiraa marka la kululeeyo ay u daataan?*
5. *Wax isbeddel ahi ma ku dhacaa gacmahaaga oo qoyan haddii aad qorraxda u dhigto?*



## 6.6 Biyahee ayaa ku habboon in la cabbo?




*Aad ugu fiirso sawirrada sare. Maxaa aad ku aragtaa? Weligaa meel webi ah ma tagtay? Sidee ayaa ay u eg yihiin biyaha webigu? Ma isku eg yihiin biyaha webiyada iyo kuwa ceelashu? Midkee ayaa aad u malaynaysaa in ay nadiif yihiin? Kuwee ayaase ku habboon in la cabbo? Biyaha harooyinka, balliyada iyo webiyada waxa ku jira cayayaanno waxyeela caafimaadka qofka. Maxaa ka mid ah cayayaannadaasi? Ma taqaannaa cuddurada ay keenaan cayayaann-adaasi? Wax ka sheeg cudurada ay keenaan? Sidee ayaa cayayaan-nadaasi looga nadiifiyaa biyaha? Ma u malaynaysaa in karintu ay kaalin ka qaadato nadiifinta biyaha? Waa kuwee biyaha cabbidda ku wanaagsan?*

*Layli:*

1. *Maxaa biyaha loo kariyaa inta aan la cabbin?*
2. *Karintu maxaa ay biyaha u tartaa?*
3. *Ma taqaan hab kale oo aan ahayn karinta oo biyaha loo nadiifiyo?*
4. *Biyaha qasabadda (tuubada) iyo kuwa webiga midkee ayaa ku habboon in la kariyo?*
5. *Sheeg cudurrada laga qaado biyaha aan nadiifka ahayn.*







*Aad ugu fiirso sawirrada sare. Maxaa ay muujinayaan? Gabadha sawirka kowaad ka muuqataa maxaa ay samaynaysaa? Marada ashuunka (jalxadda) afka ka saarani maxaa ay u taraysaa? Biyaha inta aan la cabbin maxaa loo karkariyaa? Si aad uga jawaabto su'aalahaas, samee tijaabadan: Waxa aad u baahan tahay laba bakeeri, maro nadiif ah iyo biyo wasakh ah. Bakeeriyada mid ka mid ah biyo wasakh ah ku soo shub, ka kalana marada nadiifta ah afka ka saar. Biyaha wasakhda ah ku shub bakeerigii marada nadiifta ahi dul saarnayd ilaa ay biyuhu ka dhammaadaan.*

*Maxaa aad ku aragtay marada dusheeda? Maxaa ay ku kala duwan yihiin biyuhu hadda iyo markii hore? Habka noocan ah ee biyaha loo sifeeyaa waxa loo yaqaanaa miirid, habka sawirka labaad ee boggga 135aad ka muuqdana waxa loo yaqaanaa karin, ma taqaanaa hab kale oo biyaha loo sifeeyo, waa maxay dhurid?*

*Layli:*

1. *Magacow inta hab ee biyaha loo sifeeyo?*
2. *Sharax kooban ka bixi habka dhuridda?*
3. *Biyaha maxaa loo sifeeyaa?*
4. *Habkee ugu wanaagsan hababka sifaynta biyaha?*
5. *Degaankiina habkee ugu caansan sifaynta biyaha?*







*Aad ugu fiirso sawirka sare, maxaa uu muujinayaa? Immisa ilood oo kala duwan ayaa aynu biyaha ka helnaa? Cuntada biyo ma laga helaa? Sidee ayaa aynu biyaha u kaydsannaa? Magaalooyinka iyo miyiga ma isku si ayaa biyaha looga kaydsadaa? Kulku biyaha wax isbeddel ah ma ku sameeyaa? Biyaha haddii kul badan lagu sii daayo maxaa ku dhaca? Biyahee ayaa ku habboon in la cabbo? Waxa habboon in biyaha aynu cabbaynaa ahaadaan nadiif, haddaba sidee ayaa biyaha looga dhigi karaa nadiif? Badanaaba biyaha waxa loo sifeeyaa saddex siyaabood oo kala ah: Dhurid, miirid iyo karin. Habkee ayaa ugu habboon sifaynta biyaha? Cabbidda ka sokow waxa wanaagsan in aan biyaha wasakhda ha lgu qubaysan.*

*Biyaha waxa ay kaalinta ugu muhiimsan kaga jiraan jiritaanka noolaha, dhirta iyo xayawaanka midna biyo la'aan ma noolaan karo. Imisa siyaalood oo kala duwan ayaa aynu biyaha u isticmaalnaa?*


*Layli:*

*Meelaha bannaan ku buuxi mid walba erayga ku habboon.*

1. *Magaalooyinka biyaha waxa lagu kaydsadaa (_________)*
2. *_______________la'aantood noole ma jiri karo.*
3. *Habka_______________ayaa ugu habboon sifaynta biyaha.*
4. *Biyaha haddii aad lo kariyo waxa ay_______________*
5. *Cuntooyinka ugu biyaha badan waxa ka mid ah___________.*









*U fiirso sawirka sare, maxaa aad ku aragtaa?*

*Madiibadda (baaquli) janjeera maxaa geeskeeda ka muuqda?*

*Biyaha hawo ma ku jirtaa?*




*Sawirka labaad maxaa uu muujinayaa? Buuufinka maxaa ku jira?*

*Hawadaasi xaggee ayaa ay ka timid.*

Xayawaanka hawo ma laga helaa? U fiirso sawirka saddexaad, maxaa aad ku aragtaa? Caleenta biyaha ku dhex jirta, waa maxay dhibcaha yar yar ee dusheeda ka muuqda? Dhirta hawo ma ku jirtaa?

Tijaabo 1aad:

Soo qaado madiibad (baaquli) af ballaaran, biyo iyo koob.

Madiibadda afka balaaran biyo ka buuxi ka dibna koobka faaruqa ah waxa aad si toos ah ugu foorarisaa madiibadda biyuhu ka buuxaan, sida ka muuqata sawirka 1aad ee bogg 139aad qaybtiisa b. Ku cadaadi koobka biyaha, maxaa aad dareentay? Koobkii kor u qaad ka dibna isla madiibadkii biyuhu ku jireen ku foorari koobkii, adiga oo dhinac u janjeerinaya koobka, sida ka muuqata sawirka 1aad ee bogga 139aad qaybtiisa, t. Maxaa aad ka dareentay biyaha? Biyaha hawo ma ku jirtaa? Ma sheegi karta hab kale oo aad ku caddayn karto in biyaha hawo ku jirto?

Tijaabo '2':

Soo qaado buufin, ka dibna afuuf ilaa uu buufinku aad ugu kala baxayo; sida ka muuqata sawirka 2aad ee bogga 139aad.




Maxaa buufinka weyneeyey? Hawadaasi xaggee ayaa ay ka timid? Xayawaanka hawo ma ku jirtaa? Ma samyn kartaa tijaabo kale oo muujinaysa in xayawaanka hawo ku jirto?

Tijaabo'3':

Soo qaado digsi yar ka dibna waxa aad ka buuxisaa biyo. Marka aad biyaha ku shubto digsiga dab saar ilaa inta ay ka diirayaan. Marka ay biyuhu diiraan waxa aad ku soo goysaa caleen, ka dibna ku dhex rid biyihii diirranaa oo aad dabka ka dejisay. Maxaa aad ku aragtaa caleenta dusheeda? Dhibcahaa yar ayr maxaa aad u malaynaysaa? Dhirta hawo ma ku jirtaa? Degaankan aynu ku nool nahay hawada meel kasta waa laga helaa.

Layli:

1. Dabka hawo ma ku jirtaa?
2. Qolka faaruqa ah ee xiran hawo ma ku jirtaa?
3. Hawada xaggee ayaa laga helaa?
4. Dhirta iyo xayawaanku hawo ma u baahan yihiin?
5. Hawada ma la arki karaa?



*Aad ugu fiirso sawirka sare. Maxaa aad ku aragtaa?*

*Hawadu miyaa ay fiddaa? Sidee ayaa aad ku garan in hawadu fiddo?*

*Si aad uga jawaabtid su'aalahan samee tijaabadan:*

*Soo qaado dhalo kooka kool ah. Afka kaga xir buufin sida sawirka ka muuqata. Maxaa aad ku aragtaa. Biyo kulul ama dab hadba kii aad heshi dhalada ku dhex rid. Wax isbeddel ah ma ku aragtay dhaladii? Sidee ayaa ay noqotay buufintii? Ka bixi biyaha dhalada buufinta leh. In yar ka dib u fiirso waxa ku dahca buufinta. Wax isbeddel ah ma aragtay? Hawadu marka la qaboojiyo iyo marka la kululeeyo midkee ayaa ay fiddaa? Midkeese ayaa ay soo urурtaa?*




*Layli*

*Ku buuxi meelaha bannaan erayga ku habboon:*

1. *Hawadu waa ay ____________marka la kululeeyo.*
2. *Hawadu waa ay ____________ marka la qaboojiyo.*
3. *Hawadu waa ay fiddaa marka la ____________.*
4. *Marka la qaboojiyo hawadu waa ay ____________.*
5. *Astaamaha hawada waxa ka mid ah _______ ama _______.*

## 7.3 Hawo - qaadasho



*U fiirso sawirka sare, maxaa aad ku aragtaa? Maxaa ay muujinayaan labad fallaarood ee isweydaarka ah ee ka muuqata afka iyo sanka sawirka kor ka muuqdaa. Dadku hawo ma u baahn yihiin?*


*Sidee ayaa ay u qaataan dadku hawada? Dadku si ay u noolaadaan, dhaqdhaqaaqna u sameeyaan waxa ay u baahan yihiin hawo. Hawada ay dadku u baahan yihiin badankeeda waxa ay ka qaataan sanka, hawada aanay u baahnayn waxa ay ka sii daayaan afka. Habkaas ayaa loo yaqaana neefsasho.*



## 7.4 "Naqtiin" Hawo



*Eeg sawirka koowaad. Maxaa aad ku aragtaa? Maxaa ay kubbaddu u fidday? xaggee ayaa ay ka timid hawada kubbada laga buuxiyey?*



*U fiirso sawirka labaad. Maxaa kaaga muuqda? Maxaa ku dhacay wiilka jiifa? Ka dul fadhiyaase maxaa uu qabanayaa? Dadku hawo la'aan ma noolaan karaa?*

*Haddii aad seexato guri hawada ka xidhan iyo mid ay hawadu u furan tahay, midkee ayaa caafimaadka qofka u wanaagsan?*

*Maxaa aad dareentaa haddii aad soo gashid guri aan daaqado (dariishado) lahayn/*


*Layli:-*

*Weedhaha soo socda kuwii sax ah ku hor qor calaamadda "O".*

1. *Hawada meel walba waa laga helaa ( ).*
2. *Hawadu ma fiddo marka la kululeeyo ( ).*
3. *Hawadu waxa ay lagamamaarmaan u tahay nolosheenna ( ).*
4. *Hawadu waa ay soo ururtaa marka la qaboojiyo ( ).*
5. *Dhirta iyo carrada hawo kuma jirto ( ).*



## 8. Cabbiraad. 8.1 Sidee ayaa dhererka loo cabbiraa




*U fiirso sawirka sare, maxaa kaaga muuqda? Gabadha sawirka ka muuqata maxaa ay samaynaysaa? Dadku maxaa ay wax ku cabbiraan? Tallaabada, taakada iyo xusulka dadka ma isku wada midbaa? Si aad su'aalahaas oo dhan uga jawaabto, samee tijaabadan:- adiga iyo saaxiibbadaa u baxa fasalka bannaankiisa ka dibna calaamadeeya laba barood oo kala fog. Ardayda fasalkiina kolba mid ha tallaabeeyo inta labada barood isu jiraan, hal arday ha ku qoro buug, arday kasta oo fasalka ka mid ahi inta tallaaba ee uu ka dhigo labada barood dhexdooda.*


*Sidaas oo kale tijaabad ha ku sameeyeen xusul iyo taako. Ardayda oo dhammi ma is tallaabo le'eg yihiin? Ardayda intee ayaa isku taako ah? Xusul, tallaabada iyo taakada cabbir sugan ma loo adeegsan karaa? Waa maxay sababtu. Degaankiinna maxaa halbeeg cabbir loo adeegsadaa?*

*Layli:*

1. *taakada, xusulka iyo tallaabada dadku ma is wada le'eg yihiin?*
2. *Cabbiraadda kala ah farta, taakada, xusulka iyo tallaabada maxaa loogu magacaabay cabbir aan sugnayn?*
3. *Magacow cabbiraadda aan sugnayn ee degaankiina laga adeegsado?*
4. *Tallaabada cabbirka sugan maxaa la gudboon?*
5. *Cabbirka sugan iyo midka aan sugnayn midkee ayaa habboon in la adeegsado? Waa maxay sababtu?*








*Maxaa kaaga muuqda sawirrada sare? Weligaa wax ma ku cabbirtay mastarad ama mitir? Adiga iyo saaxiibkaa ku cabbira fasalkiinna tallaabo, ka dibna mid walba ha qoro inta tallaabo ee uu qolku noqday. Adiga iyo saaxiibkaa ma is tallaabo le'eg tihiin mise waa aad kala badan tihiin? Mar labaad adiga iyo saaxiibkaa qaata laba mastaradood oo isle'eg, sidii hore oo kalena u cabbira fasalka idinka oo isticmaalaya mastaradaha. Isku cabbir ma hesheen adiga iyo aaxiibkaa? Tallaabada iyo mastaradda midkee ayaa aad cabbir sugan hesheen?*

*Bal u fiirsada mastaradda aad ku cabbirteen qolka. Ma ku aragtiin qaybo yar yar? Immisa xarriijimood ayaa ku jira laba tiro oo kasta dhexdooda? Laba xarriijimood oo yar yar inta u dhexeysiba waa hal milimitir (mm). Laba tiro oo kasta inta u dhexaysa waa hal (Sm). Haddaba tobankii milimitirba waxa ay le'eg tahay hal sentimitir. Boqolkii sentimitirna waa hal mitir (m). Kunkii mitirna waa hal Kilomitir (Km).*

*10mm = 1sm*

*100sm = 1m,*

*1000m = 1Km.*


*Layli:*

*Ku buuxi tirada ku habboon meelaha bannaan:-*

1. *1sm waxa ay le'eg tahay__________mm.*
2. *2sm waxa ay le'eg tahay__________mm.*
3. *200sm waxa ay le'eg tahay__________m.*
4. *1m waxa ay le'eg tahay__________sm.*
5. *2Km waxa ay le'eg tahay__________m.*








*U fiirso sawirka sare, maxaa kaaga muuqda? Wiilka sawirka ka muuqdaa maxaa uu samynayaa? Waa maxay Mitir? Mitirku waa immisa sentimitir? Sidee ayaa aad mitir u samaysan kartaa? Si aad su'aalahaas uga jawaabto samee tijaabadan:-*

*Soo qaado loox dheer, mastarad qiyaas leh iyo qalin. Mastaradda dhinac dhig looxa sida ka muuqata sawirka sare, Mastaraddaadu waa immisa sentimitir? Sida aad ugu qiyaasaysid mastaradda looxa, waxa aad gaaraysaa boqol sentimitir, calamad ku samee bartaa. Laga soo bilaabo halkii looxu ka bilaabmay ilaa halkan aad calaamadisay ayaa qiyaasteedu tahay hal mitir.*

Looxa dheer inta aynnu soo sheegnay intee ayaa aad ka goosan kartaa una adeegsan kartaa mitir ahaan. Sidaas oo kale mitirka waxa aad uga qiyaasan kartaa waraaq adag, caag iwm. Haddii aad doonayso in aad cabirto walax qalqalloocda waxa aad mitirka ka samysan kartaa maro ama caag jilicsan, sida ka dawaarlayaashu isticmaalaan.

Layli:

1. Mitirku waa immisa sentimitir?
2. Mitirka maxaa loo adeegsadaa?
3. Sharax kooban ka bixi sida aad u samaysan karto mitir?
4. Walxaha aan toosnayn cabbirkooda, mitir walax sidee ah ka samaysan ayaa loo adeegsadaa?
5. Sharax faraqa u dhexeey milimitir, sentimitir iyo mitir.







Aad ugu fiirso sawirka sare, maxaa aad ku aragtaa? Weligaa miisaan dhab ah wax ma ku miisaantay? Culayska walxaha oo dhammi ma isku midbaa? Ma taqaanaa sida culayska walxo kala duwan loo soo saar?

Si aad uga jawaabtid su'aalahaas samee tijaabadan:-

Soo qaado misaan dhab ah. Dul saar miis, saar rubuc kiilo labada kafood mid ka mid ah. Kafadda kalena ku shub ciid ilaa ay labada kafadood isle'ekaadaan. Ku kordhi waxoogaa ciid ah kafadda ay ciiddu ku jirto. Maxaa aad aragtay? Ma simi kartaa labada kafadood? Kafadda garaamyadu ku jiraan ku kordhi dhowr garaam ilaa ay isle'ekaadaan kafadda aad ciidda ku kordhisay.

*Sidaas oo kale labada kafadood mid waxoogaa ku kordhi, una fiirso kolba midda culus. Haddaba; labada boqol iyo konton garaam waxa ay le'eg yihiin rubuc kiilo. Shan boqol oo garaam waxa ay le'eg yihiin nus kiilo. Kun garaamna waa hal kiilogaraam.*

*250 garaam (gm) = ¼ kiilogaraam (kg)*

*500 garaam (gm) = ½ kiilogaraam (kg)*

*1000 garaam (gm) = 1 kiilogaraam (kg)*


*Layli:*

*Ku buuxi erayga ku habboon meelaha bannaan:*


1. *250 gm waxa ay le'eg tahay_______Kg.*
2. *2000 gm waxa ay le'eg tahay_______Kg.*
3. *500 gm waxa ay le'eg tahay_______Kg.*
4. *1000 gm waxa ay le'eg tahay_______Kg.*
5. *3 Kg. waxa ay le'eg tahay_______gm.*



## 8.5 Miisaan ma samayn kartaa?




*Maxaa kaaga muuqda sawirka sare? Immisa qaybood ayaa uu ka samaysan yahay miisaanku? Magacow qaybihiisa kala duwan?*




*Sawirka sare maxaa uu muujinayaa? Wiilka sawirka ka muuqdaa maxaa uu samaynayaa? Degaankiinna miisaan noocee ah ayaa laga adeegsadaa?*


*Si aad u samayso miisaan fudud soo qaado qalabkan:*
*Xarig, loox siman iyo laba daasadood. Looxa siman xarigga yar ku xir, si aad meel uga soo laalaadiso. Labada daasadoodna mid walba laba meelood ka dalooli, xarigga ku xir, ka dibna looxa labadiisa gees ku kala xir. Marka aad dhammayso miisaanka fudud, soo qaado laba walxood, ka dibna midba miisaanka labadiisa kafadood dhinac ka saar. Waxa aad kala ogaan midda culus. Sidaas oo kale walxo kala duwan isugu qiyaas midka culus.*

*Layli:*


1. Qaybta miisaanka ee wax la saaro maxaa loo yaqaannaa?
2. Miisaanka maxaa loo adeegsadaa?
3. Magacow qaybaha kala duwan ee garaamyada wax lagu cabbiro.
4. Sheeg laba siyaalood oo loo magacaabo marka la isu geeyo saddex rubuc kiilo.
5. Sharax kooban ka bixi sida wax loo miisaamo.







*Aad ugu fiirso sawirka sare, maxaa kaaga muuqda?*
*Maxaa aad u malaynaysaa in ay dhiisha ku jiraan?*
*Caanaha degaankiinna sidee ayaa loo cabbiraa?*
*Magacow weelasha kala duwan ee degaankiina caanaha lagaga cabbirto iyo sida ay u kala waaweyn yihiin. Hoorarka kala duwan ee degaankiinna laga helo, sida caanaha, subagga, gaaska iyo malabka ma isku weel ayaa lagu cabbirtaa? Magacow hababka kala duwan ee hoorarkaas loo cabbirto iyo mid walba weelka lagu cabbirto. Qalabka lagu cabbiro gaaska iyo subaggu ma la mid baa kuwa lagu cabbiro hoorarka kale?*





*Aad ugu fiirso sawirka sare. Maxaa lagu cabbiraa hoorka degaankinna? Hoorarka kala duwan sida: Saliidda, Subagga, Caanaha, Malabka iwm. Ma isku weel ayaa lagu cabbiraa mise weelal kala duwan? Weelalkaasi ma kuwo cabbir sugan leh baa mise waa ay isbeddelaan? Ma habboon tahay in la isticmaalo weel cabbir sugan leh? Ma taqaannaa weel cabbir sugan leh oo degaankiinna laga isticmaalo? Ma taqaannaa in halka litir yahay kun milimitir?*

*Waa immisa mililitir nus litirku? Waa immisa militirkii rubuc litirka?*



*Layli:*

1. *Immisa hoor ayaa degaankiinna laga cabbiraa?*
2. *Waa kuwee weelasha degaankiinna wax lagu cabbiraa?*
3. *Immisa weel oo litir qaad ah ayaa aad taqaannaa?*
4. *Ma samayn kartaa weel litir qaad ah?*
5. *Immisa militir ayaa ku jirta 1/8 litir.*





*Aad ugu fiirso sawirrada sare. Sawirka kowaad maxaa kaaga muuqda? Ardaydaasi xaggee ayaa ay u socdaan? Waqtiga ay ardaydaasi dugsiga tegayaan waa goorma? Ardayga sawirka labaad ka muuqdaa maxaa uu samaynayaa? Miiska uu ardaygu wax ku akhrisanayo dushiisa maxaa ka soo laadlaada? Waa waqtima goorta ardaygaasi wax akhrisanayaa? Marka ay qorraxdu soo baxdo ilaa inta ay ka dhacayso maxaa loo yaqaanaa? Waa maxay faraqa u dhexeeya subax, barqo, duhur, galab (casar) iyo fiid? Waa maxay habeen? Toddobadii maalmood ayaa loo yaqaannaa toddobaad. Soddonka maalmoodna waxa loo yaqaannaa bil.*




*Sannadku waa immisa bilood? Waqtiyada aynnu soo sheegnay sida suban, baarqo, duhur, casar iyo fiid ma aha ammin sugan, laakiinse waqti sugan waxa loo adeegsadaa saacadda. Dugsiga immisada ayaa aad tagtaa? Habeenkii waqtima ayaa aad seexataa? Halkii saac waxa ay u qaybsantaa qaybo yar yar, sida ½ saac oo ah saacadda marka laba meelood loo qaybiyo meel ahaan, ¼ saac oo ah saacadda marka afar meelood loo qaybiyo meel ahaan, iyo daqiiqad oo ah marka saacadda lixdan meelood loo qaybiyo meel ahaan. Halkii saac waa immisa daqiiqo? ½ saac waa immisa daqiiqadood? ¼ saac waa immisa daqiiqadood? Saacaddu waxa ay ahmiyad weyn u leedahay nolosha magaalada, sababta oo ah waxa ay innoo sheegtaa waqti sugan.*

*Layli:*

*Ku buuxi erayga ku habboon meelaha bannaan:-*

1. *Duhurka iyo maqribka waqtiga u dhexeeya waxa loo yaqaan* ________
2. *Sannadku waa* ________ *bilood.*
3. *½ saac waxa weeye* ________ *daqiiqadood.*
4. ________ *waxa ay innoo sheegtaa waqti sugan.*
5. *180ka daqiiqadood waa* ________ *saacadood.*

1



*Subaxii waqtima ayaa aad toostaa? Saacaddee ayaa aad dugsiga tagtaa? U fiirso saacadda ka muuqata sawirka kowaad, immisadii ayaa ay kuu tilmaamaysaa? labada gacmood ee saacadda midda gaabani tiradee ayaa ay kor saaran tahay? Waa toddobadii.*

*Dugsiga goormaa ayaa aad ka soo baxdaan? Qorraxdu marka ay cirka bartankiisa taagan tahay maxaa loo yaqaannaa? Saacadda ka muuqata sawirka labaad waqtima ayaa ay tilmaamaysaa? Labadii gacmood ee saacaddu isku meel ayaa ay taagan yihiin. Waa laba iyo tobankii.*

2



3




*Habeenkii waqtima ayaa aad wax akhrisataa? Salaadda cishe waqtima ayaa la tukadaa? Labada gacmood ee saacaddu xaggee ayaa ay kala tilmaamayaan? Gacanta gaabani xaggee ayaa ay saaran tahay? Waa immisadii saacadda sawirka sadexaad?*



*Labada gacmood ee saacaddu waa ay kala dheer yihiin. Midi waa ay dheer tahay, ta kalena waa ay gaaban tahay. Gacanta gaabani waa ay tilmaantaa saacadda, ta kalena waa ay tilmaantaa daqiiqadaha. Mar alla marka ay gacanta gaabani saaran tahay tiro, gacanta dheerina 12ka, waxa saacadda lagu magacaabaa tiradaa. Saacadda waxa lagu magacaabaa halka ay taagan tahay gacanta gaaban, daqiiqadahana waxa laga tirsadaa gacanta dheeri inta tiro ee ay socotay, iyada oo labadii tiro inta u dhexaysaaba la xisaabinayao shan daqiiqo. Marka la sheegayo waqtiga, waxa lagu dhawaaqaa saacadda iyo inta daqiiqadood ee ay dhaaftay, sida saddexdii iyo labaatan. Marka ay tirada daqiiqaduhu dhaafto iyo inta daqiiqadood ee ka dhiman sida afartii oo shan la'. Halkii saac waxa ay ka kooban tahay lixdan daqiiqadood, sidaa darteed soddonkii daqiiqadood waxa la yiraahdaa nusa saac. Shan iyo tobankii daqiiqadoodna waxa la yiraahda rubuc saac. Gacanta ugu yar ee saacaddu waxa ay tilmaantaa ilbidhiqsiyada.*

*Layli:*

1. *Saacaddu waa immisa daqiiqadood?*
2. *Sharax kooban ka bixi sida loo magacaabo saacadda?*
3. *Waa maxay waxtarka saacaddu?*
4. *Labada gacmood ee saacaddu maxaa ay kal tilmaamaan?*
5. *Labada gacmood ee saacaddu marka ay lixda saaran yihiin saacaddu waa immisadii?*



*Aad ugu fiirso sawirrada sare, maxaa kaaga muuqda?*

*Qalabka kor ka muuqda maxaa loo adeegsadaa?*

*Qalabkaas kuwee mugga hoorka lagu cabbiraa?*

*Miisaanka maxaa loo adeegsadaa?*

*Sheeg biraha wax lagu miisaamo mgacyadooda kala duwan.*

*Mitirka maxaa loo adeegsadaa?*

*Walxaha qalqallooca mitirka lagu cabbiro ma loox ayaa laga sameeyaa? Magacow hoorarka badanaaba lagu cabbiro dhalooyinka.*

*Dadka aan saacadda haysani maxaa ay ku tilmaansadaan waqtiga?*

*Maxaa ay inoo sheegayaan erayada kala ah subax, barqo, duhur, casar dheer, casar, fiid, caways iyo habeen.*



*Erayadaasi ma tilmaamayaan waqti sugan?*

*Si loo helo waqti sugan ayaa ay dadku u adeegsadaan saacadda.*


*Cabbiraaddu waxtar weyn ayaa ay inooleedahay.*

*Cabbiraaddu ma sheegto wax male ah, laakiinse waxa lagu gartaa walax kasta qiyaasteeda sugan. Mitirka waxa lagu cabbiraa dhererka. Miisaanka waxa lagu cabbiraa culayska, dhalada, litirka iyo koombadana waxa lagu cabbiraa mugga hoorka. Saacaddana waxa lagu cabbiraa amminta.*

*Layli:*

*Meelaha bannaan mid walba ku buuxi erayga ku habboon.*

1. *Mitirka waxa loo adeegsadaa cabbirka ________ halkii mitirna waa ________ sentimitir.*
2. *________ waxa loo adeegsadaa cabbirka ________ labadii saacadoodna waa ________ daqiiqadood.*
3. *Litirka waxa loo adeegsadaa cabbirka ________ halkii litirna waa ________*
4. *________, waxa loo adeegsada cabbirka ________, halkii kiiilona waa ________, garaam.*
5. *Cabbirka mugga hoorka waxa kale oo loo adeegsadaa ________ iyo ________*




*Aad ugu fiirso sawirrada sare, maxaa kaaga muuqda sawirradaas? Labada boodh (Tabeelle) ee labada arday kor u hayaan maxaa faraq ah ee u dhexeeya? Walxaha kuu dhow haddii aad ka fogaato baaxaddooda wax isbeddel ahi ma ku dhacayaa? Si aad su'aalahaas uga jawaabto, samee tijaabadan:-*


*Adiga iyo saaxiibbadaa soo qaata laba boodh oo isle'eg oo far isku mid ahi ku qoran tahay. U baxa garoonka dugsiga ama meel bannaan, adigu barxadda meel gees ah iska taag labadaada saaxiibna iyaga oo boodhadhkii wax ku qornaayeen kor u haya midna meel toban tallaabo kuu jirta ha istaago, ka kalena meel boqol tallaabo kuu jirta ha istaago, sida ka muuqata sawirka sare. Maxaa faraqa oo u dhexeeya labada boodh? Farta ku taalla labada boodh ma isle'eg tahay? Waa maxay sababtu?*







*U fiirso sawirka sare, maxaa aad ku aragtaa? Ardayda sawirka ka muuqataa maxaa ay eegayaan? Dayaxa iyo Xiddigaha midkee weyn? Maxaa aad ku garanaysaa? Weligaa habeen cirka ma u fiirsatay? Xiddiguhu ma is wada le'eg yihiin? Waa maxay sababtu? Waxa aynnu casharkii hore ku soo barannay in walaxda marka aad ka sii fogaataba muuqaalka baaxaddeedu sii yaraado, sidaa darteed, walax kastaaba walaxda ay kaaga dhawdahay muuqaalka baaxaddeedu waa uu ka weyn yahay. Xiddiguhu waa ay ka waaweyn yihiin dayaxa, hase yeeshee, waa ay ka fog yihiin dayaxa. Sidaa darteed waxa ay u muuqdaan in ay ka yar yihiin dayaxa. Xiddiguhuna sidaa oo kale uma kala weyna sida ay u muuqdaan, ee waa ay kala fog yihiin.*




*Aad ugu fiirso sawirka sare, maxaa kaaga muuqda?*

*Tooshka (Karbuunada) ardaygu gacanta ku hayo wax iftiin ahi ma kaaga muuqdaa? Waa maxay sababtu? Xiddiguhu maalintii miyaa ay dhacaan? Maxaa aynnu u arki weynay maalintii ee aynnu habeenkii oo keliya u aragnaa? Qorraxdu waa ay ka iftiin weyn tahay ilaysyada dabiiciga ah iyo kuwa dad-samee ah labadaba. Sidaa darteed, maalintii qorraxdu waa shiiqisaa ilaysyada kale oo dhan sida dayaxa, xiddigaha, nalalka, faynuusyada iyo tooshashka. Weligaa iyada oo maalin ah oo gurigiinna daaqaduhu u furan yihiin nal ama faynuus ma shidday? Maxaa iftiin ah oo kaaga kordhay? Haddii aad daaqadaha xidho oo aad daahyadana jiiddo, iftiin ma arkaysaa? Waa maxay sababtu?*







*Aad ugu fiirso sawirka sare, maxaa aad ku aragtaa?*

*Qaabka dhulka sidee ayaa uu u eg yahay?*

*Habeenka iyo maalinta maxaa dhaliya?*

*Qorraxdu ma taagan tahay mise waa ay socotaa?*

*Si aad uga jawaabto su'aalahaas samee tijaabadan:*

*Soo qaado toosh (karbuuno), kubbad caag ah ama liin weyn kolba kii aad hesho iyo bir dhuuban ama qori. Ka dusi birta dhuuban liinta, ka dibna dul saar miis. Iyada oo fasalka daaqadihiisu xidhan yihiin tooshka ku daar kubbadda ama liinta kolba ka aad haysato adiga oo dhinac ka taagan sida ka muuqata sawirka bogga 169aad ee buuggaaga.*


U fiirso iftiinkaasi dhinaca uu kaga beegan yahay kubbadda, ma ilays baa mise waa mugdi? Wareeji kubbadda, dhinacii mugdiga ahaa, waxa uu noqon doonaa ilays, dhinacii iftiinka ahaana waxa uu noqon doonaa mugdi. Dhulku waxa uu u wareegsan yahay sida kubbadda, waxaana uu ku wareegaa udub dhexaadkiisa, hase yeeshee qorraxdu waa ay taagan tahay. Tijaabada aad sameysay qorraxdu waxa ay u dhigantaa tooshka, kubbadduna waxa ay u dhigantaa dhulka. Markaa, dhulka dhinaca ay qorraxdu haysaana waa maalin, dhinaca ka sii jeedaana waa habeen, sidaa darteed habeenka iyo maalintu waxa ay ka dhashaan wareegga dhulka.

*Layli:*

1. *Dhulka iyo qorraxda midkee ayaa wareega?*
2. *Qaabka samayska dhulku waa sidee?*
3. *Sharax sida habeenka iyo maalintu u dhashaan?*
4. *Dhulka oo dhami ma isku mar ayaa uu habeen yahay? Waa maxay sababtu?*
5. *Habeenka iyo maalinta maxaa dhaliya?*








*Aad ugu fiirso sawirka sare, maxaa aad ku aragtaa?*

*Ilayska shamaca ka baxayaa xaggee ayaa uu maray?*

*Xarriq toosan ayaa uu raacaa, mise waa uu leex leexdaa?*

*Si aad su'aalahaas uga jawaabtid, samee tijaabadan:*

*Soo qaado saddex warqadood oo adadag, sida kuwa baakooyinka alaabta lagu keeni. U samee warqadaha hab ay isu taagi karaan sida ka muuqata sawirka. Saddexda waraaqadood isku meel ka dalooli, ka dibna dul saar miis. Soo qaado shamac daaran, dabadeed waxa aad dhinac ka dhigtaa saddexdii warqadood oo isku beegan. Warqadda ugu dambeysa daloolkeeda ka soo eeg ilayska shamaca, ma kuu muuqdaa ilayskii?*

Saddexda warqadood mid ka leexi halkii ay taallay, sidii hore oo kale u eeg ilayskii shamaca, ma kuu muuqdaa ilayskii? Waa maxay sababtu? Tijaabadani waxa ay muujinaysaa in haddii daloollada warqadaha isku beegan yihiin uu ilaysku ka wada dhex dusi karo, haddii aanay dalloolada warqaduhu isku beegnayna aanu ka dusi karin ilayska, taasina waxa ay innoo caddaynaysaa in ilaysku xarriiq toosan maro.


Weligaa qol xiran oo ilayska qorraxdu daloollo yaryar ka soo gelayso ma gashay? Ilayskaasi ma xarriiq toosan ayaa uu raacayey, mise waa uu qalqaloocay? Ilayska oo dhammi ama dad-samee ha ahaado ama mid dabiiciya ha ahaadee waxa uu maraa xarriiq toosan.

Layli:

1. Tiri ilaha ilaysku ka yimaado ee aad taqaan.
2. Ilayskaasi ma xarriiq toosan ayaa uu raacaa mise waa uu leexleexdaa?
3. Ma taqaanaa ilays aan xarriiq toosan marin?
4. Ilayska dabiiciga ah sida dayaxa iyo qorraxdu ma xarriiq toosan ayaa uu maraa?
5. Ilayska nalalku miyaa uu qalqalloocdaa mise xarriiq toosan ayaa uu maraa?







Aad ugu fiirso sawirka sare, wiilka ka muuqdaa maxaa uu gacanta ku hayaa? Ilayska tooshka (Karbuuno) ka soo baxayaa halkee ayaa uu ku dhacayaa? Ilayska muraayadda ka soo noqday xaggee ayaa uu ku dhacay? Ma laga yaabaa in ilayska muraayadda ka soo noqday meel kale u dhici karo? Walxaha oo dhan marka toosh lagu iftiimiyo ilays ma ka soo noqdaa? Waa maxay sababtu? Si aad su'aalahaas oo dhan uga jawaabto samee tijaabadan? Waxa aad u baahan tahay toosh, miis iyo muraayad ballaadhan. Tijaabadan marka aad samaynayso waxa habboon in daaqadda iyo albaabka fasalka la xidho si ay tijaabadan si fiican ugu muuqato.


*Soo qaado tooshkii iyo muraayaddii. Muraayadda dul dhig miiska, kaddibna miiska dhinaca derbi ka xigo mooyee dhinaca kale iska taag. Ku qabo tooshka muraayadda isaga oo daaran, dabadeedna u fiirso waxa ka muuqda derbiga ka dambeeya miiska. Ilayskii muraayadda ma ka soo noqday? Halkee ayaa ilayskii muraayadda ka soo noqday ku dhacay? Haddii barta aad muraayadda ilayska kaga qabatay ka leexiso oo dhinac kale kaga qabato wax isbeddel ahi ma ku dhacayaa noqodka ilayska. Isku day inaad tijaabadaas samayso. Adiga iyo saaxiibbadaa tijaabadaasi sameeya. Walxaha korkoodu siman yahay ee widdhwidha (birbirqa) sida muraayadda ayaa ah ilays noqodsiiyaasha ugu wanaagsan.*

*Layli:*

1. *Sharax kooban ka bixi ilays noqod.*
2. *Walxaha oo dhammi miyaa ay ilayska soo celiyaan?*
3. *Waa maxay ilays noqodsiiyayaasha wanaagsani?*
4. *Magacow shan walxood oo aan ilaysku ka soo noqon.*
5. *Fallaaraha ilayska ka soo noqda walxaha miyaa ay qalqalloocaan mise waa ay toosan yihiin?*







*Aad ugu fiirso sawirrada sare. Maxaa ay muujinayaan?*
*Cirka maxaa kaaga muuqda? Xiddigaha iyo dayaxa midkee ayaa muuqaal ahaan weyn? Waa maxay sababtu? Walaxda marka aad ka fogaato iyo marka aad ku dhowaato ma isle'eg tahay muuqaal ahaan? Ilaysku marka uu ku dhaco walxaha qaar waa uu ka soo noqdaa kuwana kama soo noqdo, maxaa ka mid ah walxaha uu ilaysku ka soo noqdo? Walxaha uu ilaysku ka soo noqdo korkoodu waa sidee? Weligaa qol xiran oo iftiin yari soo gelayo ma gashay? Ilayska soo galaya ma toos ayaa uu u soo galaa mise qalqallooc ayaa uu u galaa.*


*Ilaysku xarriiq toosan ayaa uu maraa. ilayska walxuhu waa uu is shiiqiyaa. Ilays bixiye kastaa walaxda uu ka ilays badan yahay waa uu shiiqiyaa. Xiddiguhu maxaa ay maalintii u muuqan waayeen? Maalintii daaqadaha fasalka oo furan haddii aad nalka shiddo iftiinkiisu sida habeenkii ma u muuqanayaa? Waa maxay sababtu?*

*Layli:*

1. *Walaxda marka aad ka fogaato muuqaalkeeda wax isbeddel ahi ma ku dhacaa?*
2. *Xiddigaha maxaa habeenkii oo keliya loo arkaa?*
3. *Waa maxay ilays noqod?*
4. *Walxaha ilaysku ka soo noqdo oogadoodu maxaa ay kaga duwan tahay walxaha kale?*
5. *Sharax kooban ka bixi erayga shiiqis.*








*Waa maxay carro? Maxaa ay carradu ka samysan tahay?*

*Carrooyinka oo dhammi ma isku wada midbaa?*

*Maxaa ay ku kala duwan yihiin carrooyinka aad taqaan?*

*Carrooyinku waxa ay ku kala duwan yihiin xagga midabka, kala weynaanta xabbadooda, biyo haynta iyo waxyaabaha ay ka kooban yihiin. Si aad u ogaato in carrooyinku ku kala duwan yihiin xagga haynta biyaha samee tijaabadan:*

*Waxa aad u baahan tahay laba daasadood oo af bannaan, laba carro oo kala ah carro dhoobo iyo bataax iyo biyo. Labada carro ku kala shub labada daasadood, ka dibna, labadoodaba ku shub biyo isle'eg.*

Dhowr daqiiqadood ka dib u fiirso labadii carro. Ma biyo isle'eg ayaa ku jira? Midkee ayaa biyha ku jiraa badan yihiin?

Carrooyinku haynta biyaha waa ay ku kala duwan yihiin.

Si aad u ogaato waxyaabaha kala duwan ee carradu ka kooban tahay, samee tijaabada ka muuqata sawirka labaad ee bogga 177aad ee buugaaga. Waxaa u baahan tahay carro, weel quraarad ah iyo biyo, weelka quraaradda ah ku shub carro, ka dibna biyo ka buuxi.

Maxaa aad ku aragtay weelkii? Waa maxay heerarka kala duwan ee dhalada ka muuqdaa? Waxa ugu sarreeya caleemo yar yar iyo qashin oo ah heerkab, heerka ta, waxa weeye biyo nadiif ah. waxa xiga j oo ah ciid wanaagsan oo dhoobo ah, heerka ku xigaa waa "x" oo ah balaax; heerka kh, waxa weeye dhagxaan yar yar, waxaan ugu hooseeya `d' oo ah dhagxaan waaweyn. Sidee ayaa lagu kala soocaa kala weynaanta xabbadda ee carrada?

Layli:

1. Carradu maxaa ay ka kooban tahay?
2. Magacow noocyada kala duwan ee aad taqaan.
3. Carrada bataaxa ah iyo carrada dhoobada middee ayaa xabbad weyn?
4. Maxaa lagu kala soocaa carrooyinka kala duwan?
5. Magacow nooca carrada ee degaankiinna ugu badan?








Aad ugu fiirso sawirka sare. Maxaa aad ku aragtaa?

Carrada hawo ma ku jirtaa? Sidee ayaa aad ku garanaysaa in carrada ay hawo ku jirto? Si aad uga jawaabtid su'aalahaas samee tijaabadan: Soo qaado bakeeri biyo ku jiraan iyo bakeeri weyn oo carro ay ku jirto. Dulsaar miiska bakeeriga weyn ee carradu ay ku jirto. Ku shub bakeeriga biyaha ah midka ay carradu ku jirto.

Ma aragtay wax isbeddel ah? Maxaa keenay xumbada soo fidh fidh leh? Waa maxay xumbadaasi? Xaggee ayaa ay ka timid?

Carraa hoosteeda waxa ku nool xayawaanno kala duwan.

Xaggee ayaa ay xayawaannadaasi ay ka helaan hawada?



*Aad ugu fiirso sawirka sare, maxaa aad ku aragtaa?*

*Xaddiga hawada ah ee ku jira bataaxa iyo carro cadka midkee ayaa badan? Carro madowdu ma ta ugu hawo badan baa carrooyinka? Hawada ku jirta carrooyinku miyaa ay isle'eg yihin mise waa ay kala badan yihiin? Si aad ku garato xaddiga hawo ee ku jira carrooyinka samee tijaabadan: Soo qaata adiga iyo saaxiibkaa saddex bakeeri oo isle'eg, saddex nooc oo carro kala duwan ah sida bataax, carro cad iyo carro madow, iyo baaquli (Madiibad) weyn oo biyo ah. Midkiin ha dul saaro miiska dushiisa saddexda bakeeri oo mid kasta carro gooni ahi ku jirto.*




*Soo qaado baaquliga biyuhu ku jiraan, ka dibna biyaha saddexda bakeeri kolba mid ku shub adiga oo u fiirsanaya bakeeri kasta waxa ku dhacaya. Biyaha ka soo bood boodaya bakeeriyada ma isku wada mid baa? Bakeerigee biyaha ka soo bood boodayaa ugu badan yihiin? Bakeerigee biyaha ka soo fidhfidh lihi ugu yar yihiin?*


*Maxaa ay caddaynaysaa kala duwanaanta biyaha bood boodaya ee bakeeriyadu?*

*Layli:*


1. *Xaddiga hawada ee carrooyinka ku jira ma isku midbaa?*
2. *Carradee xaddiga hawada ee ku jirta ugu badan tahay?*
3. *Carro madow iyo carro bataax middee hawada ku jirtaa badan tahay?*
4. *Carrada furfurka ah iyo ta isku dheggan middee hawada ku jirtaa badan tahay? Carrooyinka oo dhan hawo ma ku jirtaa?*




*Carradu waxtar ma innoo leedahay? Waxa jira waxyaabo dhibaato u geysta carrada waxaana ka mid ah carro guurka.Xooluhu carro-guurka ma ka qayb qaataan?*




*Dabayluhu sida ay dhibaato u leeyihiin ayaa ay carradana dhibaato ugu geystaan. Dabayluhu waxa ay kaalin weyn ka qaataan carro-guurka. Sharax kooban ka bixi sida ay dabayluhu carro-guurka uga qayb qaat-aan.*





*Maxaa ka mid ah waxyaabaha carrada meesheeda ka dhaqaajiya? Daadadka xoogga lihi carrada ma qaadaan. Xaggee ayaa ay geeyaan? Biyaha waxa ay kaalinta ugu weyn ka qaataan carro-guurka.*



*Degaankiinna waxyaabaha carro-guurka u keeni kara maxaa ugu badan? Xooluhu carro-guurka sidee ayaa ay uga qayb qaataan? Maadaama ay carradu waxtar weyn innoo leedahay, waxa habboon in la daryeelo, lagana ilaaliyo wixii dhibaato u geysanaya oo lagala dagaallamo. Sidee carro-guurka looga hor tegi karaa? Beerista dhirtu kaalin ma ka qaadataa ka hortagga carro-guurka?*

*Layli:*

1. *Waa maxay carro-guur?*
2. *Magacow waxyaabaha carro-guurka dhaliya, Sharax koobanna ka bixi mid walba sida uu uga qayb qaato.*
3. *Carro-guurku sidee ayaa uu dhibaato ugu geystaa carrada?*
4. *Degaankiinna carro guur ma ka jiraa? Maxaa dhaliya?*
5. *Sidee carro-guurka looga hortegi karaa?*



*Carradu maxaa ay ka samaysan tahay?*

*Xabbadaha ay carrada ka sameysan tahay ma is wada le'eg yihiin?*

*Carro madowda iyo carro-bataaxa midkee xabad weyn?*

*Carrooyinka oo dhan waxa ku jira hawo, sidee ayaa loo kala saari karaa sida carrooyinku u kala hawo badan yihiin?*

*Carrooyinku waa ay kala boodh badan yihiin?*


*Imisa siyaabood ayaa aad u kala sooci kartaa carrooyinka? Carradee ayaa aad u malaynaysaa in aya waxbeerista ugu fiican tahay? Maxaa loo yaqaannaa carrada badanaaba laga helo meelaha biyo marrnnada ah sida webiyada, ilaha iyo dooxooyinka.*



*Carradu waxtar weyn ayaa ay innoo leedahay, hase yeeshee waxa jira waxyaabo dhibaato u geysta carrada loona baahan yahay in laga hortago. Waxyaabaha dhibaatada carrada u geysta waxa ka mid ah xoolo fara badan oo dhulka xaalufiya (daaqa ka madhiya), dabaylaha faraha badan ee carrada wanaagsan qaada iyo daadadka xoogga leh. Waxyaabaha aynnu kor ku soo sheegnay waxa loo yaqaannaa waxyaabaha carro-guurka dhaliya. Sidee carro-guurka looga hortegi karaa?*

*Layli:*

1. *Carradu maxaa ay ka sameysan tahay?*
2. *Magacow sida Carrooyinku biyaha u kala hayn og yihiin.*
3. *Carrada bataaxa ah badanaa xaggee laga helaa?*
4. *Magacow waxyaabaha carro-guurka dhaliya.*
5. *Sharax sida biyuhu uga qayb qaataan carro-guurka.*



*U fiirso sawirka kowaad. Maxaa aad ku aragtaa? Weligaa qof ooyaya ama qoslaya ma aragtay? Maxaa aad dareentay?*

*Sidaas oo kale ma aragtay gaari socda ama diyaarad hawada maraysa? Maxaa aad dareentay? Sanqadhaha kala duwan ee walxahaasi sameeyaan iyo kuwo kale oo fara badan ayaa loo yaqaanaa jabaq. Tiri jabaqaha aad maqasho maalintii. Jabaqaha aad maqashaa ma isku wada midbaa mise waa ay kala duwan yihiin? Aad ugu fiirso sawirka labaad. Maxaa kaaga muuqda? Walxaha innagu xeerani waxa ay dhaliyaan jabaq. Walxaha jabaqaha sameeyaa ma gariiraan?*




*Ma sheegi kartaa dhowr walxood oo marka ay gariiran dhaliya jabaq? Jabaqda walxahaasi sameeyaan ma isku midbaa?*

*Si aad u hubiso ku samee walxo kala duwan tijaabada ka muuqata sawirka labaad ee bogga 186. Jabaqaha kala duwan ee aynnu maqalno waxa dhaliya waxyaabo kala duwan. Jabaqaha qaar noole ayaa dhaliya sida ci'da, oohinta, qosolka iwm. Kuwa kalena waxa dhaliya ma noole sida guuxa, gariirka iwm. Jabaqahas qaar dadku waa ay dhibsadaan, kuwana waa ay jeclaystaan.*

*Layli:*

1. *Waa amxay jabaq?*
2. *Magacow jabaqaha ugu caansan ee aad malin kasta maqashid.*
3. *Sheeg saddex jabaqood oo noole dhaliya iyo saddex ma noole dhaliyo.*
4. *Maxaa ka mid ah jabaqaha dadku dhibsado.*
5. *Magacow afar ka mid ah qalabka muusikada ee jabaqda dhaliya.*





*Aad ugu fiirso sawirka kowaad. Maxaa ay samynayaan wiilka iyo gabadha ka muuqdaa? Wax ma maqlayaan? Adiga ma maqli kartaa hadalka saaxiibkaa marka aad labada dhegod is qabato?*

*Si aad uga jawaabto su'aalahaas sameeya tijaabadaa oo kale adiga iyo saaxiibkaa. Midkiin dhegaha ha isqabto, ka kalena hoos ha u hadlo, ma maqashay hadalka saaxiibkaa? Haddana ka qaad gacamha labada dhegodba. Sidii oo kale ha u hadlo saaxiibkaa.*

*Ma maqashay hadalkiisa? Labada jeer midkee ayaa aad si fiican wax u maqashay? Dheguhu faa'iido ma innoo leeyihiin?*




*U fiirso sawirrada ka muuqda sawirka labaad.*

*Xayawaannada ka muuqda dhegahoodu ma isku eg yihiin? Maxaa ay ku kala duwan yihiin? Xayawaannada aad taqaan kuwee ugu dheg dhaadheer? Dameeraha iyo geela midkee dhega dhaadheer leh? Midkee ayaa wax maqli og?*

*Layli:*

1. *Waa maxay faa'iidada ay dhegahu innoo leeyihiin?*
2. *Xayawaannada dhegahoodu maxaa ay iskaga mid yihiin?*
3. *Dhegaha dadka iyo kuwa eeydu maxaa ay ku kala duwan yihiin?*
4. *Dadka iyo eeyda midkee ayaa wax maqli og? Waa maxay sababta?*
5. *Haddii aad warqad adag duubto oo aad dhegta ku qabato iyo haddii aad caadi wax u dhegaysato midkee ayaa aad si fiican wax u maqashaa? Waa maxay sababtu?*




*U fiirso sawirka kowaad. maxaa aad ku aragtaa? Maxaa ay gabadhu dhegta ku haysaa? Maxaa ay mastaradda ku haysa? Jabaqdu ma dhexmartaa adkaha? Sidee ayaa aad ku garan in jabaqdu ay dhex marto adkaha?*




*Si aad uga jawaabto su'aalahaas samee tijaabadan: Soo qaado mastarad dheer iyo saacad. Ku qabo mastaradda dheer saacadda sida ka muuqata sawirka. Wax isbeddel ah ma dareentay? Maxaa aad maqashaa? Walaxda adag ee dheer iyo walaxda adag ee gaaban midkee ayaa aad si fiican wax ugu maqli kartaa?*

*Aad ugu fiirso sawirka labaad. Maxaa kaaga muuqda? Maxaa ay gabadhu samaynaysaa? Maxaa uu wiilku u adeegsaday warqadda uu dhegta ku hayo? Si fiican wax ma u maqlayaa?*

## MAHADNAQ

Xarunta Horumarinta Manaahijtu Waxa ay u mahad celineysaa:-

*Qoreyaasha buugga:*

1. Cumar Jaamac Maxamed
2. Rashiid Ismaaciil Xuseen
3. Cali Maxamed Axmed
4. Maryan Xaashi Cawaale
5. yaasiin Cismaan Dhinbil
6. Axmed Ibraahim Kooshin
7. Deeqa Cilmi Cali
8. Maxamed Ismaaciil Suldaan

*Sawirayaasha Buugga*

1.Ibraahim Maxamed Cismaan
2.Maxamed Sh. Cumar (Joon)

*Madaxa Qaybta KMM*
A. M. Bookh

*La taliyaha qaybta KMM*
Jim Goodall

*Xiriiryaha Madbacadda iyo X. H. Manaahijta*
Xuseen Maxamed Ismaaciil

*La taliyaha Guud ee X. H. Manaahijta:*
*Mike A. Kiernon*

Waxaa kale oo mahad gaar ahaaneed leh bahda Xarunta Horumarinta Waxbarashada UNESCO ee Baydhabo oo kaalin weyn ka qaatey dib u soo saaridda buuggan daabacaadiisa labaad:-

| | | |
|---|---|---|
| 1. Cusmaan Sheekh Adan Xaydar | | Tifaftiridda |
| 2. Aadan Maxamed Macalin | | Tifaftiridda |
| 3. Cabdullaahi Cabdiraxman Ibrahim | (Tubey) | Garaacidda |
| 4. Xuseen Maxamed Cabdullahi | (Husni) | Garaacidda |
| 5. Maxamed Adan Guuleed | (Juuni) | Sawirrada/Layout |
| 6. Maxamed Cali Sh. Saciid | (Kumisariyo) | Sawirrada/Layout |
| 7. Maxamuud Siidow Maxamed | (Juundo) | Layout |

*La Taliayaha*
G. Retamal
UNESCO EDUCATIONAL ADVISER FOR SOMALIA

United Nations Educational, Scientific and Cultural Organization

# SAYNIS
# 4

**MAHADNAQ**

*This edition has been produced with the financial support of the European Community.* UNESCO WAXA AY U MAHAD CELINAYSAA EC-SOMALIA OO SUURTA GELISAY DIB U DAABICIDDA BUUGGAN.

AGOOSTO 1995